
VOLUME 5

# MAANSADA MASIIXA



## Anthology of Somali Christian Poetry

Aweis A. Ali
Series Editor

# MAANSADA MASIIXA

## Anthology of Somali Christian Poetry

**Aweis A. Ali**

**MAANSADA MASIIXA**

***Anthology of Somali Christian Poetry***

*Volume 5*

First Edition, 2023
Maandeeq Publishing

ISBN 978-99990-996-7-7

9 789999 099677 >

Dr. Aweis A. Ali

Maandeeq Publishing

Maandeeqpublishing@gmail.com
Jigjiga, Ethiopia

This book has been published under the auspices of the Somali Bible Society. Mogadishu, Somalia.

www.Somalibiblesociety.org
info@Somalibiblesociety.org

ISBN 978-99990-996-7-7

First Edition, 2023

CHRISTIAN POETRY

Copyright ©
Aweis A. Ali, PhD
amazingwisdom@gmail.com
https://aliaweis.academia.edu/

Book Cover Photo by Jassim Shanavas. Unsplash

Aayadaha Kitaabka Qudduuska ah waxaa laga soo qaatay

Kitaabka Quduuska Ah. Bible Society of Kenya, 1979. Revised by SIM in 2008
Translated by: Aadan Jimcaale Faarax †
Assisted by: Yuusuf Nuur Ciise & Yuusuf Salaad ††
Facilitated by: Warren & Dorothy Modricker ††


## TABLE OF CONTENTS

DEDICATION....viii
TUSMADA BUUGGA ....ix
HORDHAC.... xv
QIRASHADA IIMAANKA....xvi
U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA.... xvi
BARYADA RABBIGA ....xvii
SABUURKA NEBI DAA'UUD.... xvii
TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE ....xviii
KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA....xviii
AYUUB .... 2
AMAANA ILAAH....3
IFTIIMIYE WAA ILAAH....4
IFTIINKAAGA GAADHSII....4
LA'AANTAA ILAAHOOW.... 5
ARXANKAAGA NOO FIDI....6
AWOODLOW ILAAH.... 7
WAXAAN AHAY ADDEECE.... 8
KHAYRIYO BARAKAAT HANTIDAY....11
BAYBALKA EEBBE ....11
BAAQ ....13
BADBAADSHAHA U KAALAYA....17
BOQORKII BOQORADA....18
TUBTA KHAYRKA LAGU TAGO.... 21
JACAYLKAAGU WAA NOLOL....23
XAQNIMADAADA GUUSHA LEH....25
XAMDIYO MAHAD BAAN WADNAA.... 26
XARIG LAMA SITAAN.... 26
NAFTAAD DOORATAA KU JECELOO.... 31
DAA'UUD....32
BAABTIIS ....33

DAA'IMOOW ILAAHOOW........34
DARIIQA AAKHIRO........35
IFTIINKU DAARAY........37
SIDAY DOONISTAADU TAHAY........38
DAMBIDHAAFKA NOO FIDI........39
QABIIL LA ISU DILA IYO........39
DARDAARAN........40
DAWADAADI NOO KEEN........41
DUCEEYOO SOO BAXAAY........42
DAWAALOO SAYID MASIIX........43
WAAN DABBAAL DAGAYNAA........44
KUWA CIISE RAACOOW........46
RUUXIISA NAGU SHUBAY........46
REERAHA U YEEDHAAY........47
RUUXIISA NAGU SHUBAY........48
NAGA YEEL SAFKAAGII........51
SAMAALOOW MASIIXII........51
SARREEYIHII DUNIDEE........52
SEYIDKU ISAGAA KU SIIN........53
SARREEYIHII DUNIDEE........54
NAGA YEEL SAFKAAGII........55
JANADA SAAMIGII LA DHIGAY........55
SOOMAALIDII SHANTA AHAYD........58
AADAN IYO XAAWO........60
DHIDIB WEEYE ADAG........62
XAQA LAMA DHAQAAJOO........63
DHIB IYO GEERIDA U MARAY........64
DHALASHO YAAB LEH........65
CIISOOW MASIIXOW........67
CAD LAGU SIIYAY........68
XAQII BAA NOO CADAADOO........71
CISEEYA........72
CALOOL SAMAAN........73

UBAXYADAN UGURA........................................................................................ 76
MASIIXAY GAAR U TAHAY...............................................................................77
CIISE NAGAMA GO'I KARO........................................................................... 77
GARGAARKAAGA NOO FIDI.......................................................................... 78
FAAFIYA WANAAGGA...................................................................................81
MASIIX BAAN QAABILAA..............................................................................83
BADBAADADU QAALI WEEYAAN................................................................. 84
RABBI NAGA KOR QAAD............................................................................... 84
AMAANTIISAN QAADNAA.............................................................................85
KADEEDKII NAGA DHAMAA......................................................................... 88
SOOMAALIDAN LA WAALEE......................................................................... 90
LOO YAHAY MARKHAATIGA......................................................................... 92
MASIIXU MA QAYBSAMEE ...........................................................................92
LOO MARKHAATI YAHAY.............................................................................. 93
AYAAN MAANTA QIRAYAA...........................................................................94
MAHAD AY U CELIYEEN.................................................................................95
NABAD SIIYE WAA ADI.................................................................................. 98
WANAAJIYE WAA ILAAH............................................................................. 100
HOOY YIMAADAAY.......................................................................................102
NOO HIBEEYAY TIISII ...................................................................................103
WAAN ISKU HALLEEYAA ............................................................................104
ERAYGAAGA HODANKA AH.........................................................................105
WAXA AAN LA YAABAA............................................................................. 107
GUNAANAD....................................................................................................108
ABOUT THE AUTHOR....................................................................................109
OTHER BOOKS BY DR. AWEIS A. ALI ........................................................... 110

**DEDICATION**



Keene (1909-1995) and Helen (1905-1992) Spitler were pioneering missionaries who dedicated their lives to serving Somalis. They passed away in Nairobi, Kenya, where they had settled after retiring. Tragically, their only child, Jonathan George Spitler (1948-1959), died in Jigjiga, Ethiopia, where the family had been serving as missionaries. This book is a tribute to their memory.

**TUSMADA BUUGGA**

1. AYUUB
Cali Shariif Ibraahim

2. AMAANA ILAAH
Y. B. Xirsi

3. IFTIIMIYE WAA ILAAH
Y. B. Xirsi

4. IFTIINKAAGA GAADHSII
Y. B. Xirsi

5. LA'AANTAA ILAAHOOW
Y. B. Xirsi

6. ARXANKAAGA NOO FIDI
Y. B. Xirsi

7. AWOODLOW ILAAH
Y. B. Xirsi

8. WAXAAN AHAY ADDEECE
Amin A. Axmed

9. KHAYRIYO BARAKAAT HANTIDAY
Amin A. Axmed

10. BAYBALKA EEBBE
Cali Shariif Ibraahim

11. BAAQ
Cali Shariif Ibraahim

12. BADBAADSHAHA U KAALAYA
Y. B. Xirsi

13. BOQORKII BOQORADA
Cali Shariif Ibraahim

14. TUBTA KHAYRKA LAGU TAGO
Y. B. Xirsi

15. JACAYLKAAGU WAA NOLOL
Y. B. Xirsi

16. XAQNIMADAADA GUUSHA LEH
Y. B. Xirsi

17. XAMDIYO MAHAD BAAN WADNAA
Y. B. Xirsi

18. XARIG LAMA SITAAN
Abwaan Shakiib

19. NAFTAAD DOORATAA KU JECELOO
Amin A. Axmed

20. DAA’UUD
Cali Shariif Ibraahim

21. BAABTIIS
Cali Shariif Ibraahim

22. DAA’IMOOW ILAAHOOW
Y. B. Xirsi

23. DARIIQA AAKHIRO
Cali Shariif Ibraahim

24. IFTIINKU DAARAY
Y. B. Xirsi

25. SIDAY DOONISTAADU TAHAY
Y. B. Xirsi

26. DAMBIDHAAFKA NOO FIDI
Y. B. Xirsi

27. QABIIL LA ISU DILA IYO
Y. B. Xirsi

28. DARDAARAN
Abwaan Qaamuus

29. DAWADAADI NOO KEEN
Y. B. Xirsi

30. DUCEEYOO SOO BAXAAY
Y. B. Xirsi

31. DAWAALOO SAYID MASIIX
Y. B. Xirsi

32. WAAN DABBAAL DAGAYNAA
Y. B. Xirsi

33. KUWA CIISE RAACOOW
Y. B. Xirsi

34. RUUXIISA NAGU SHUBAY
Y. B. Xirsi

35. REERAHA U YEEDHAAY
Y. B. Xirsi

36. RUUXIISA NAGU SHUBAY
Y. B. Xirsi

37. NAGA YEEL SAFKAAGII
Y. B. Xirsi

38. SAMAALOOW MASIIXII
Y. B. Xirsi

39. SARREEYIHII DUNIDEE
Abwaan Shakiib

40. SEYIDKU ISAGAA KU SIIN
Abwaan Dictionary

41. SARREEYIHII DUNIDEE
Abwaan Shakiib

42. NAGA YEEL SAFKAAGII
Y. B. Xirsi

43. JANADA SAAMIGII LA DHIGAY
Y. B. Xirsi

44. SOOMAALIDII SHANTA AHAYD
Aweis A. Ali

45. AADAN IYO XAAWO
Cali Shariif Ibraahim

46. DHIDIB WEEYE ADAG
Y. B. Xirsi

47. XAQA LAMA DHAQAAJOO
Y. B. Xirsi

48. DHIB IYO GEERIDA U MARAY
Y. B. Xirsi

49. DHALASHO YAAB LEH
Abwaan Qaamuus

50. CIISOOW MASIIXOW
Bashiir Muuse

51. CAD LAGU SIIYAY
Cali Shariif Ibraahim

52. XAQII BAA NOO CADAADOO
Y. B. Xirsi

53. CISEEYA
Abwaan Shakiib

54. CALOOL SAMAAN
Cali Shariif Ibraahim

55. UBAXYADAN UGURA
Y. B. Xirsi

56. MASIIXAY GAAR U TAHAY
Y. B. Xirsi

57. CIISE NAGAMA GO’I KARO
Y. B. Xirsi

58. GARGAARKAAGA NOO FIDI
Y. B. Xirsi

59. FAAFIYA WANAAGGA
Y. B. Xirsi

60. MASIIX BAAN QAABILAA
Y. B. Xirsi

61. BADBAADADU QAALI WEEYAAN
Amin A. Axmed

62. RABBI NAGA KOR QAAD
Y. B. Axmed

63. AMAANTIISAN QAADNAA
Y. B. Xirsi

64. KADEEDKII NAGA DHAMAA
Y. B. Xirsi

65. SOOMAALIDAN LA WAALEE
Aweis A. Ali

66. LOO YAHAY MARKHAATIGA
Y. B. Xirsi

67. MASIIXU MA QAYBSAMEE
Y. B. Xirsi

68. LOO MARKHAATI YAHAY
Y. B. Xirsi

69. AYAAN MAANTA QIRAYAA
Amin A. Axmed

70. MAHAD AY U CELIYEEN
Y. B. Xirsi

71. NABAD SIIYE WAA ADI
Y. B. Xirsi

72. WANAAJIYE WAA ILAAH
Y. B. Xirsi

73. HOOY YIMAADAAY
Y. B. Xirsi

74. NOO HIBEEYAY TIISII
Y. B. Xirsi

75. WAAN ISKU HALLEEYAA
Amin A. Axmed

76. ERAYGAAGA HODANKA AH
Y. B. Xirsi

77. WAXA AAN LA YAABAA
Aweis A. Ali

# HORDHAC

Buuggani waa kii afaraad (Volume 4) ee taxanaha *Maansada Masiixa* oo sanadkiiba mar soo baxa. Sida looga bartayba, waxaa buuggan dhex ceegaaga suugaan qiimo leh oo lagu waynaynayo Rabbiga. Waxaa maansadan halkan ku miisan iska kaashaday suugaan yahanno Soomaaliyeed oo raacsan Sayid Ciise Masiiix. Waannu uga mahadnaqaynaa sida ay ugu deeqeen maansooyinkan dhaxal galka ah oo baal dahab ah ka geli doona taariikhda kiniisadda Soomaaliyeed.

Suugaantu waxay Soomaalida dhexdeeda ku leedahay miisaan wayn waxaana mar mar lagu sheegaa in ay tahay afka malaa'igta iyo luqadda Eebbe ugu jecel yahay! Haddii laga tago buun buuninitaas ka badbadiska ah, waxaan shaki ku jirin in maansooyinku ka qurux iyo qiimo badan yihiin tiraabta oo idil. Maansooyinka halkan ku xusan waxaa ku dhan waxbarasho Kitaabi ah oo qiimo wayn u leh Masiixiyiinta Soomaaliyeed.

Dhaqanka Soomalidu wuxuu weli ku salaysan yahay wax afka laga sheego oo weli uma gudbin qoraal. Tan ayaa keenta in maansooyin badan iyo taariikh Soomaaliyeed oo qiimo leh ay innaga lunto halkaasna aannu ku dhaxal beelno. Abaabulka taxanaha Maansada Masiixa waxaa udub dhig u ah in aysan suugaanta kiniisadda Soomaaliyeed laga ilaaliyo lumid waayo waa tii horay uu u yiri Abwaan Cabdi Beegsi Warfaa (Cabdi Sinimoo), "Wixii la qoraa, quruuma haree, muxuu hadal qiimo leeyahay?"

Mar ay ahaataaba waxaa suugaanta Maansada Masiixa la saari doonaa muusik iyo laxan waxaana ku codayn doona fanaaniin Soomaaliyeed oo Rabbiga jecel. Inta laga gaarayo taas, ku raaxaysta suugaantan qoraalka ah.

Fadlan, innoo soo gudbiya wixii talo iyo tusaale ah oo lagu hormarin karayo taxanaha Maansada Masiixa. Waxaa intaas dheer in aan ku casuumayno dhammaan suugan yahanada Soomalaiyeed ee ku xiran Sayid Ciise Masiix in ay innoo soo gudbiyaan suugaan walba oo faa'iido u leh kiniisadda Soomaaliyeed. Waxaad maansooyinkiina innoogu soo gudbisaan e-mailkan: amazingwisdom@gmail.com

Dr. Aweis A. Ali
Twitter: @DrAweisAli
https://aliaweis.academia.edu/

## QIRASHADA IIMAANKA

Waxaan rumaysannahay Eebbaha Aabbaha ah
Kaas oo ah Qaadirka abuuray samada iyo dhulka
Iyo Ciise Masiix oo ah Inankiisa qura iyo Sayidkeena
Kaas oo ka dhashay Ruuxa Qudduuska ah
Waxaana dhashay Maryan oo bikra ah
Waxaa uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos
Iskutallaabta ayaa lagu qodbay, wuu geeriyooday, lana aasay
Wuxuu galay Goobtii Dadka Geeriyooday
Kuwii dhintay ayuu ka soo sarakacay maalintii saddexaad
Wuxuu aaday samada oo uu ku negaaday isaga oo ku sugan
Gacanta midig ee Eebbaha Aabbaha Qaadirka ah
Halkaas ayuuna ka iman doonaa si uu u xukumo
Kuwa nool iyo kuwa dhintayba.
Waxaan rumaysannahay Ruuxa Qudduuska ah
Kiniisadda Ciise Masiix ee caalamiga ah
Jameecada awliyada ah, cafinta dembiga
Sarakicidda jirka iyo nolosha weligeed ah

Waxaa Turjumay Aweis A. Ali

## U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA

Eebboow Ilaahow, kuwa aad u yeertay
In ay Eraygaaga, Soomaalida u geeyaan
Ku adeecay adigee, ammarkaaga raacay
Howshu waa mid adagoo, sahal aan ahayne
Afka waxay ka doonaan, uurka uga baahdaan
Eebboow Allaw sii, adey kuu adeegaan

Agab waxay u baahdaan, yaaney waayin Eebboow
Ka ilaali cuduroo, caafimaad adigu sii

Cidla yaanay aragoo, abidkood ay ciishoon

Ehel iyo asxaab sii, halkii ay tagaanba

Afka markay furayaan, hadal adigu oo hag

Axadkii maqlaaba, ha raaco Injiilka

Kuwa Eraygaaga, raaca oo rumeeya

Oo towbad keena, bartana Injiilk

Waa xertaadi adigee, garabkood Allow gal

Ka xijaab shar oo idil, oo ku xooji Ruuxa

Miro badan Allow sii, ku addeeca adigoo

Eraygaaga baraya, Soomaali oo idil

Waxaa curiyay Dr. Aweis A. Ali

**BARYADA RABBIGA**

Matayos 6:9-13

Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan. Oo jirrabaadda ha noo kaxaynin, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. AAmin.

**SABUURKII NEBI DAA'UUD**

Sabuur 23:1-6

Kanu waa sabuur Daa'uud tiriyey.

Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.

Wuxuu i fadhiisiyaa doog qoyan dhexdiis,

Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda.

Naftayda wuu soo celiyaa.

Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada.

In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada,

Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa,

Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.

Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu diyaarisaa miis,

Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buuxdhaafaa.

Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis,

Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

**TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE**

Baxniintii 20:3-17

Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.

Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah masayr, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda xajiya.

Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.

Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakeeyey maalintii sabtida ahayd oo quduus uga dhigay. Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo.

Waa inaanad qudh gooyn.

Waa inaanad sinaysan.

Waa inaanad waxba xadin.

Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.

Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.

**KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA**

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,*

*Dadka dhulka oo dhammow, Rabbiga u gabya.*

*Rabbiga u gabya, oo magiciisa ammaana,*

*Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka maalin.*

*Ammaantiisa quruumaha dhexdooda ka sheega,*

*Oo shuqulkiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan ka dhex sheega.*

Sabuur 96:1-3

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,*

*Waayo, isagu wuxuu sameeyey waxyaalo yaab badan,*

*Gacantiisa midig iyo dhudhunkiisa qudduuska ahuna waxay keeneen badbaado.*

*Rabbigu wuxuu dadka ogeysiiyey badbaadadiisii,*

*Oo xaqnimadiisiina wuxuu bayaan ugu muujiyey quruumaha hortooda.*

*Oo wuxuu soo xusuustay naxariistiisii iyo aaminnimadiisii uu u qabay reerka binu Israa'iil,*

*Dadka dhulka darfihiisa jooga oo dhammu way wada arkeen badbaadinta Ilaaheenna.*

*Inta dhulka joogta oo dhammay, Rabbiga farxad ugu qayliya,*

*Dhawaaqa, oo farxad ku gabya, oo ammaan ku gabya.*

*Rabbiga ammaan ugu gabya idinkoo kataarad haysta,*

*Kataarad iyo codka heeska ugu gabya.*

*Boqorka Rabbiga ah hortiisa farxad kaga dhawaajiya*

*Turumbooyin iyo buunan.*

*Badda iyo waxa ka buuxaaba ha guuxeen,*

*Dunida iyo kuwa dhex deggan oo dhammuna ha dhawaaqeen,*

*Webiyadu ha sacbiyeen,*

*Oo buuruhuna dhammaantood farxad ha kaga gabyeen Rabbiga hortiisa,*

*Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dhulka xukumo,*

*Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo,*

*Dadyowgana caddaalad.*

Sabuur 98:1-9

*…laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo. Iskula hadla sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa, idinkoo gabyaya oo Rabbiga qalbigiinna ka ammaanaya.*

Efesos 5:18b-19

# A

**AYUUB**

Cali Shariif Ibraahim

Ilaahii Addoonkiisa Ayuub ilaalshow
Iimaankiyo asluubtana ku adkeeyow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Eebbow eed la'aan ayaad imtixaantoo
Aaminaantiisiiyuu isna ku aflaxee
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Aafadii ololkee owlaadii asiibtay
Uma urugoone alxaamduu iirsaday
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Ibtileyntii owrtiyo addoomadiina
Uma asqoobinoo aawadaa illowyoo
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Abuurkow itaalkiisa ku aslaaxiyay
Eediyo abaar la'aan ayuu ka idlaadoo
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Idil oogadiisii cudur baa asiiboo
Afkiisuna erayga Eebbow yuu ahaa
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Arrimihii Ibliiska Ayuub ma' iineyn
Asluubtiisaad Allow unugtoo ebeddo
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Ilmihii adduunkoo dhan uma uu ilmeyn
Iriddaadow Eebbow soo aadoo abbaaray
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adna aqbashayoo abaalkii u oofisoo
Illinkaaga ashqaraarka yuu imaanoo
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow
Adigaa ammaan idilkeed leh Ilaahow

**AMAANA ILAAH**
Y. B. Xirsi

Aan ducayna oo
Aynu soo baxnee
Idilkeed xertaay
Amaana Ilaah

Awooddiisa badan
Aynu aaminee
Isu soo baxaay

Eraygiisa wacan
Aynu quudanee
Isu soo baxaay

Aabbaheena wayn
Waa Ilaah la hubo
Isu soo baxaay

Ilayskiisan shidan
Aynu eegannee
Isu soo baxaay

Ehelkeeni baa
Baahi u qabee
Isu soo baxaay

Inagoo guclayn
Aynu gaadhna ee
Isu soo baxaay

Injiilka Ilaah
Aan u gayna ee
Isu soo baxaay

Bulshaa oomanee
Aan harraad tirree
Isu soo baxaay

Ha aamusinee

Aan u hiilinee
Isu soo baxaay

**IFTIIMIYE WAA ILAAH**
Y. B. Xirsi

Inagu urur baynu nahay
Ilaah doortay baynu nahay
Injiilkana waan sidnaa

Amaanta Ilaahay iyo
Erayga waan sheegaynaa
Afkeena ma xidhi kartaan

Awooduu Ruuxu sido
Iblaysku ma joojin karo
Ilayskiyo nuurkan shidan
Iftiimiye waa Ilaah

Ilaaliye waa Ilaah
Baryoo u dirsada gargaar
Amaantiisaydun heli

Awooduu Ruuxu sido
Iblaysku ma joojin karo
Ilayskiyo nuurkan shidan
Iftiimiye waa Ilaah

**IFTIINKAAGA GAADHSII**
Y. B. Xirsi

Arladiyo dhulkeenii
Ummaddii ku noolayd
Aafada qabiilkiyo
Iblaysbaa halleeyoo
Aheey baday abaaraha

Eraygii Ilaahay

Awood weeye waafiyaa
Idilkiinba kaalaya
Aan u dhiibno taloo
Guusha aynu gaadhnee

Eebboow ku tuugnee
Ummaddaa Gargaaraha
Xaqnimada u gayn kara
Alloow maanta siiyoo
Iftiinkaaga gaadhsii

Ummad yahay walaaliyo
Ehel baynu wada nahay
Aabbo kuu gargaariyo
Adigoon awood helin
Albaabada ha xidhanina

Mugdi aan ilays jirin
Haadayska aakhiro
Ayaan kaaga digaye
Injiilkii Ilaahiyo
Xaqnimada u kaalaya

Eebbow ku tuugnee
Ummaddaa gargaaraha
Xaqnimada u gayn kara
Alloow maanta siyoo
Iftiinkaaga gaadhsii

**LA'AANTAA ILAAHOOW**
Y. B. Xirsi

Awaysoo[1] aduunyada
Ilaahii abuuraa
Udubkeeda taagoo
Idilkeedba wada dhigay

Samadaad arkaysiyo

[1] Aweis A. Ali, tifaftiraha buuggan.

Dhulkan aan ku noollahay
Inagiyo ugaadhuba
Arsaaqdeena wada dhigay

Ilaahii na uumoow
Adigaa awood loo
Eraygaagu Aabboow
Intuu xoognasiiyuu
Sharka naga ilaashaa

La'aantaa Ilaahoow
Irbad dhuub magalinoo
Eraygii afkaagaa
Eebboow caddeeyee

Naxariis adaa lehe
Amaantaada badan baa
Uurkiyo afkayguba
Alloow ay qiraayaan

Ilaahii na uumoow
Adigaa awoodloo
Eraygaagu Aabboow
Intuu xoog nasiiyuu
Sharka naga ilaalshaa

**ARXANKAAGA NOO FIDI**
YB Xirsi

Allihii na uumoow
Adigaa wanaagiyo
Awood oo dhan kuu tahay
Ammaan kuu ahaataa

Rabbigii na uumoow
Na ilaalinaayoow
Eeboow ku tuuknee
Naga saamax eedahaa

Annagoon Ilaahoow
Hortaadaa istaahilin
Aabboow dambaabnee
Asturoo xumaatada
Arxankaaga noo fidi

Aafada iblayskee
Ammaantaada diidiyo
Naga awd xumaantoo
Kuu adeege naga yeel

Annagoon Ilaahoow
Hortaadaa istaahilin
Aabboow dambaabnee
Asturoo xumaatada
Arxankaaga noo fidi

**AWOODLOW ILAAH**
YB Xirsi

Ilaahaygiyow
Adigaan baryada
Aan tuugayaa

Waxaan ahay addoon
Aad uumatoo
Dunuub aada galay

Isma bixin karoo
Ebar baan ahee
Allow noo gargaar

Awoodlow Ilaah
Adigay amaan
Kuu ahaatayoo
Ifka noole jira
Arsaaq siiya oo
Abnigooda suga

Albaabada janada
Naxariis udgoon
Adigaa iska leh

Intaad dooratee
Ehelkaaga iyo
Ubadkaag ah

Aanu doogsanee
Naga yeel Ilaah
Kuwaad daawan adi

Awoodlow Ilaah
Adigay amaan
Kuu ahaatayoo
Ifka noole jira
Arsaaq siiya oo
Abnigooda suga

**WAXAAN AHAY ADDEECE**

Amin A. Axmed

Waxaan ahay adeege
Loo diray Injiilka
Inuu u geeyo ummadaha
Aan iftiinka weli arag
Ee Iblaysku lumiyay

Ma nastoo ayaan qurah
Wacdi baan adduunyada
Rug waliba ku oogaa
Maalin iyo allaylba

Amarradii Masiixa
Kol haddaan adkaynayo
Waa mahad Isaga uun
U ahaatay kelidii

Waxaan ahay addeece
Rabbigiisa aaminay
Goor iyo ayaanba
Dhabtii isku-tallaabta
Ku xambaarta oogada

Hantidayda idilkeed
Xagga saraan ku urursha
Halka aan aboorkiyo
Tuuggu abid ku bi'inayn

Amarradii Masiixa
Kol haddaan adkaynayo
Waa mahad Isaga uun
U ahaatay kelidii

# B

**KHAYRIYO BARAKAAT HANTIDAY**
Amin A. Axmed

Boqorka waynee na uumay
Rumaysad kolkaad ku barido
Wax kastood u baahan tahay
Boggiyo laabta aad ku haysaba
Bi'i waa kaba waayi mayside

Iimaanku haddaanu buurnayn
Midaan baraxtiran ahaynba
Inay camalladu ku burayaan
Bayaan u ogow haddeerba

Masiixii ku soo badbaadshay
Adoo baadi ahaa ku doortay
Haddaad u bogtood qirayso
Inuu yahay bixiyahaaga
Khayriyo barakaat hantiday

Haddaan beenta laga fogaanin
Jacayl laabtana ka buuxsamin
Rumaysadku inuu ba'aayoo
Ogow hal bacaad ku maal noqon

**BAYBALKA EEBBE**
Cali Shariif Ibraahim

Badbaadada guude
Ilaah beegsadoo
Idilkiin Baybalka
Eebbe u bareera

Ha ka bayrininee
Dulucdiisa baara
Baybalka Maasiixa
Eebbe u bareera

Baybalkaa Rabbigu
Idinkugu baaqay

Ha baal marininee
Eebbe u bareera

Ciddii ka bayrtaa
Hanata balaayee
Kutubka bogsiintee
Eebbe u bareera

Baybalka Eebbaa
Dadku ku barwaaqoo
Bilic samaan lahee
Eebbe u bareera

Mid la bowsadiyo
Boob toona maahe
Baybalka run aahe
Eebbe u bareera

Billowga Dunidiyo
Biyihii korkooda
Isagaa ka hadlee
Eebbe u bareera

Dulliga Bidcanimiyo
Dariiqooyin beena
Baybalka diidaye
Eebbe u bareera

Baylahda guud iyo
Bakhiilnimada gaar
Kutubka baabbashee
Eebbe u bareera

Baab aargudashiyo
Baas baas ugu celin
Baybalka ka digee
Eebbe u bareera

Booli cunidda iyo
Hanti layska boobo

Baybalka tirtiree
Eebbe u bareera

Baalka Masiixiyo
Bartankaa Firdooso
Baybalka caddeeye
Eebbe u bareera

**BAAQ**
Cali Shariif Ibraahim

Waa baaqii iftinkee
dadweynow haka baqin
Boqortooyiyo xoogey
Bini'aadan dhiseenoo
Waa baaqii iftiinkee
Dadweynow haka baqin
Boqortooyiyo xoogey
Bini'aadan dhiseenoo

Been ahoon lagu raageyn
Oo barqa cad baabi'i
Ee intaad ka beyrtaan
Doona barta toobada
Been ahoon lagu raageyn
Oo barqa cad baabi'i
Ee intaad ka beyrtaan
Doona barta toobada

Eebbe waa baarriyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee
Eebbe waa baarriyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna

Isagaa idinka baxaayee

Muxuu ruux u balwaa
Haddii ow u bareero
Inuu iska baal maro
Boqortooyada guude
Muxuu ruux u balwaa
Haddii ow u bareero
Inuu iska baal maro
Boqortooyada guude

Badbaadshe Masiixiyo
Barashada Beybalka
Eed adigu ugu baaqday
Inaad u bidhaamiso
Badbaadshe Masiixiyo
Barashada Beybalka
Eed adigu ugu baaqday
Inaad u bidhaamiso

Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee
Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee

Durba wada beegsadoo
Abbaara bixiyaha
Midka Banka Qiyaame
Intiisu ey badbaadi
Durba wada beegsadoo
Abbaara bixiyaha
Midka banka Qiyaame

Intiisu ey badbaadi

Iyagoo aan ka baqeyn
Halaagga iyo baaskoo
Bishaarada tiigsaayoo
Balooleyda ciyaari
Iyagoo aan ka baqeyn
Halaagga iyo baaskoo
Bishaarada tiigsaayoo
Balooleyda ciyaari

Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee

Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee

Idilkiin baraarugoo
Eebbe baryoo dhaha
Ilaahow barakaale
Jidkaaga noo bidhaami
Idilkiin baraarugoo
Eebbe baryoo dhaha
Ilaahow barakaale
Jidkaaga noo bidhaami

Barakadaada ayaa
Ruuxaad ula bareerto
Baalna aan ka mareyne
Noogu baaq abshirtaada
Barakadaada ayaa
Ruuxaad ula bareerto

Baalna aan ka mareyne
Noogu baaq abshirtaada

Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee

Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee

Rabbow ku barinaye
Baaxaddaa Masiixa
Kuwii ku badbaadoo
Baraara naga yeel
Rabbow ku barinaye
Baaxaddaa Masiixa
Kuwii ku badbaadoo
Baraara naga yeel

Baylahda loo diidoo
Masiixu ugu baaqo
Khayr iyo barwaaqiyo
Baalkiisa waasacaa
Baylahda loo diidoo
Masiixu ugu baaqo
Khayr iyo barwaaqiyo
Baalkiisa waasacaa

Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna

Isagaa idinka baxaayee

Eebbe waa baariyoo
Aad u beer nuguloo
Jaceyl badanna lahoo
Cidna aan baleyne
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee
Usheegta baahidiinna
Isagaa idinka baxaayee

**BADBAADSHAHA U KAALAYA**
Y. B. Xirsi

Boholyaw jacayl baa
Beerkayga yaaloo
Waan baaqayaa wali

Bulshadiyo dadkaygoow
Barwaaqooyin raaxale
Soo baxoo u kaalaya

Jidkan lagu badbaadee
Boqoroow Masiix dhigay
Wabiyadu burqanayaan
Badhtankiisa gaadhnee
Badbaadshaha u kaalaya

Masiixii bukaanada
Curyaanada bogsiiyee
Beryo maydki meel yiil
Nolol buuxda siin jiray
Aan bahdiisa noqonee
Nimcadiisan beegsada

Jidkan lagu badbaadee
Boqoroow Masiix dhigay
Wabiyadu burqanayaan
Badhtankiisa gaadhnee

Badbaadshaha u kaalaya

**BOQORKII BOQORADA**
Cali Shariif Ibraahim

Boqorow Masiixow
Boqorow Masiixow
Beer nugeylkiisa midkey
Boqolaal malyuumaad
Ay ku baxsadeenoo
Bariga qiyaamaha
Ka baqeyn balaayow
Boqorow Masiixow
Boqorow Masiixow
Beer nugeylkiisa midkey
Boqolaal malyuumaad
Ay ku baxsadeenoo
Bariga qiyaamaha
Ka baqeyn balaayow

Badbaadshaha guudow
Badbaadshaha guudow
Baashigow Ilaahey
Dunida ka beerow
Boqorkii Boqoradow

Boqorow Masiixow
Boqorow Masiixow
Beel kastoo ba'daa key
Ku barooraneysoo
Durba bixinaayow
Booga dhayaheennii
Loo wada baahnaayow
Boqorow Masiixow
Boqorow Masiixow
Beel kastoo ba'daa key
Ku barooraneysoo
Durba bixinaayow
Booga dhayaheennii

Loo wada baahnaayow

Badbaadshaha guudow
Badbaadshaha guudow
Baashigow Ilaahey
Dunida ka beerow
Boqorkii Boqoradow

Boqorow Masiixow
Boqorow Masiixow
Kii kaa beyraa hoogyoo
Badbaado ma arkoo
Bartanka jaxiimow
Ku bislaan abadoo
ka barooran doonaa
Boqorow Masiixow
Boqorow Masiixow
Kii kaa beyraa hoogyoo
Badbaado ma arkoo
Bartanka jaxiimow
Ku bislaan abadoo
Ka barooran doonaa

Badbaadshaha guudow
Badbaadshaha guudow
Baashigow Ilaahey
Dunidaan ka beeroow
Boqorkii Boqoradow

# T

**TUBTA KHAYRKA LAGU TAGO**

By Y. B. Xirsi

Toosiyoo Ilaahay
Taageeradiisaa
Lagu wada tanaadoo
Tubta khayrka lagu tagay

Tusmaduu dhigaabaa
Barwaaqadu tisqaaddiyo
Midho aan la tirin karin
Taabyada la buux saday

Toolmoonaheenii
Intuu ruuxa nagu taxay
Toobiyaha namariyoo
Taladiisu ay tahay

Xertoo wada tisqaaddoo
Awooddiisa lagu taxay
Aan laga tun waynayn
Yaan taamayaa ani

Taakteena xoogiyo
Tamarteena oo idil
Rabbigay ka timidoo
Tiirsigeena weeyaan

Toolmoonaheenii
Intuu ruuxa nagu taxay
Toobiyaha namariyoo
Taladiisi ay tahay

# J

**JACAYLKAAGU WAA NOLOL**
Y. B. Xirsi

Jacaylkaagu waa nolol
Jidka weeye guusha leh
Runta lagu dhex joogsado

Jaliiloow Ilaahoow
Qalbigaad jihaysaa
Na jirtaa Ilaahoow

Maalintay jikaarkiyo
Jiribaad ku mariyeen
Jidhka waranku kaa galay
Jeexyada wadnaha iyo
Ku jartee quluubtii

U jarmaada samahoo
Ka joogsada xumaantee
Jidka raaca Eebbaha

Maalintay jujuubkiyo
Xisaabtii la joogsado
Rumaystaa la jaar noqon

Maalintay jikaarkiyo
Jiribaad ku mariyeen
Jidhka waranku kaa galay
Jeexyada wadnaha iyo
Ku jartee quluubtii

# X

**XAQNIMADAADA GUUSHA LEH**

Y. B. Xirsi

Xinjirtiisa kii qubay
Noo maray xanuun daran
Xumaantii dunuubtiyo
Xanuunkeeni wada raray

Xadhkihii iblayskee
Dadka soo xannibi jiray
Xoog kaga furfurayoo
Ka xoreeyay shaydaan

Xayuunoow Ilaahoow
Adigaa xaqsooroo
Xumaantoo dhan diidee
Xaqnimada guusha leh
Xoogeedi noo keen

Kii quluubta xaadhee
Dhiiggiisa nagu xalay
Xeerkuu na baraybaa
Guusha lagu xambaaraa

Dikrigaan xadraynaa
Xertiisaanu wada nahay
Qalbigaa xasilayoo
Xamdidaanu qaadnaa

Xayuunoow Ilaahoow
Adigaa xaqsooroo
Xumaantoo dhan diidee
Xaqnimada guusha leh
Xoogeedi noo keen

## XAMDIYO MAHAD BAAN WADNAA

Y. B. Xirsi

Dadkoo taws iyo xanuun
Intay xagal daaciyeen
Xabaalaha qaar galeen

Shaydaanku intuu xanibay
Biraha ku jabshuu xidhxidhay
Xaqsoorana aan la helin

Markuu xilligiisi yimid
Rabbiga xooggiisibaa
Intuu xagga sare ka yimiid
Bulshadi ka xoreeyayoo
Xamdiyo mahad baan wadnaa

Xerada ilin laga galiyo
Xeerkiisaan raacaynaa
Xisaabiye waa Masiix

Xilligu wuu soo dhaw yee
Xertaay soo wada baxoo
Xaqnimo haloo guntado

Markuu xilligiisi yimid
Rabbiga xooggiisibaa
Intuu xagga sare ka yimid
Bulshadi ka xoreeyayoo
Xamdiyo mahad baan wadnaa

## XARIG LAMA SITAAN

Abwaan Shakiib

Xagjirada Islaamkee
Xaalufiyay dad iyo dal
Xubbi bay mar muujin
Xoogaa yar dabadeed
Waa lagu xajiimoon

Marna waa xaraar iyo
Xabagtii dhunkaaleed
Xarfo lagu xanuusado
Xoor lagu sumoobiyo
Waa xuubka caarada

Xumaantii ma dayn iyo
Qabiil laysku ximiyee
Xirfad beenta u arkaba
Waana ay xalaalayn

Xumaatada dhacdaana
Xarbiyada dhammaantood
Xurgufihii yimaadana
Ka sameeya xooloo

Sharku xaq ma ahanoo
Xumidu qiima malahane
Xal lagama sugo iyo
Cilmi xigashadiisee
Xasad yuu abuuraa
Jiilaal xumaan badan
Xabaalahana badiyee
Bal maxayba ugu xilan?

Xagjirada an sheegay
Garta wow xabeeban
Xaakim bay u tegayaan
Xaquuqdii ad leedahay
Way ku xad gudbaayaan
Xaqa uma hoggaansamaan
Wanaag waa ka xiran yahay
Xaddiiskoodu wuxuu noqon
Xeel ayaa naloo degay

Waligoodna meesha xun
Bay u xaglinaayaan
Xaajaday rogrogi oo
Dadkay kala xadaayaan
Xayn xayn in loo jabo

Xiska yay ku haayaan

Khamiis yayba soo xiran
Hadday xaajo leeyihiin
Shaaribadayba xiiran
Xawqaladayna badiyaan
Xaqiraan dadkoo idil
Waa bilaa xishoodoo

Xarfihii Qur'aankana
Nimankaas xafidayee
Xuduudaha an garanayn
Xeerku muujinaayee
Xaggee baa la idin gayn
Xaqir iyo xumaan iyo
Xamasho daynba maysaan

Markay xoolo helaan
Iblis xoog leh yey noqon
Xarragadana badiyoo
Xulashada hablahana
Aad ugu xadroodoo
Xilahooda dilayoo
Dalxiisyada xaj moodoo
Xayawaanku dhaamoo

Xagjiradaas an sheegay
Xaasaskooda dhibaya
Ku falaaya xumahoo
Xaqdarada baraayoo
Xabsi-guriga gelinoo
Xumaatooyin farabadan
Xagal daacis ugu dara
Xaaraanta uga dhiga
Sida ay xalaal tahay

Walaayaday ku xiiqeen
Ku xanibaanna dumarka
Shuruudaha ku xiraya
Iyo xaajo qoofalan

Waa xoolo urursiye
Xayiraadda dumarkee
Haddaan xoolo laga siin
Xaawo guurka loo diid

Xagjiradaas an sheegay
Hadday xanaf lahaayeen
Intay xoola boobaan
Yay xuub dhacsanayaan
Xaqa yaaba dhibayoo
Ka xanaag wanaaggii
Xubna goynta mooyee
Xal kale ma haayaan
Waa xaaluf gebigood

Xagjiradaas an sheegay
Aqoon xiisa uma lahan
Xisku male jacayloo
Xanan weeye kugu dhega
Xabaal lagu gufeeye
Waa xatooyo diintood

Xagjiradaas an sheegay
Waanada xilkastiyo
Wow xabado naareed
Waana u xanuun daran
Xarig lama sitaanow
Maxaan xiliyo kuu qabay
Inaad xaal mastuur tahay
Eebbe xujadi daahiri
Waan u xamdi naqaayaa

Xagjiradaas an sheegay
Waa jilbis xabaalan
Kugu beera xasarado
Iyo weli xanuun daran
Abees lama xambaartee
Nabad laguma xoodshee
Waa layska xooraa
Xagjirnimadu waa saas

# D

**NAFTAAD DOORATAA KU JECELOO**

Amin A. Axmed

Hadday inta dunida joogta
Dartaa ii wada colaadshaan
Amaba arrad iyo dareemo
Gaajiyo diihaal aan ba'aynin

Kollay daruufaha adkaaday
Duufaantooda lagama yaabo
Inay gudcur igu duwaanoo
Iftiinkana dib uga laabto

Naftaad doorataa ku jeceloo
Rabbow kaama daba haraayo
Illayn nolol abid duxayso
Adaa deeq igaga dhigayoo
Dulqaadkana igu mannaystay

Hadduu kii i duufsan jiray
Dagaal hadba nooc ah keeno
Weliba u soo diro xertiisii
Inay dabin ii maleegaan

Kollay ima dagi karaanoo
Horaan taa uga digtoonaa
Maalintaan dambartii Injiilka
Dibnaha saaraan ogaaday

Naftaad doorataa ku jeceloo
Rabbow kaama daba haraayo
Illayn nolol abid duxayso
Adaa deeq igaga dhigayoo
Dulqaadkana igu mannaystay

**DAA’UUD**
Cali Shariif Ibraahim

Daacaduu ahaa Daa’uud
Miduu Daa’im doortoo
Dadkiisa daryeelo
Diifyo dulli u diidoo
Demada dagaalkana
Dooxa cadawgiisoo
Digrigiisoon doonaan
Dar Allee u duubtay
Dar Allee u duubtay
Dambi kaan dafirine
Durba toobad keenoo
Dabeecad wanaagana
Dunidu la yaabtoo
Danaynta diimeedna
Dulqaad u dheeraayoo
Digrigiisoon doonaan
Dar Allee u duubtay
Dar Allee u duubtay
Da’diisii ari jirkaa
Daa’imkiisu duubtoo
Dadkii reer Israa’iil
Doodiisii ku daaloo
Difaaciisa dhabtaa
Dib dambeey arkeenoo
Digrigiisoon doonaan
Dar Allee u duubtay
Dar Allee u duubtay
Diin laawayaashii
Daallinkey soo dirteen
Daqar buu ku diloo
Durba waa dangiigsadoo
Dullaa u bambeeyey
Darkiisiina darxumo
Digrigiisoon doonaan
Dar Allee u duubtay
Dar Allee u duubtay
Dagaalkiisu ma eheen

Daacadkaa Adduunye
Diintow tiftirayoo
Dariiqeedii ku duwyoo
Dirqi ku marsiiyoo
Denbi kama saarnayn
Digrigiisoon doonaan
Dar Allee u duubtay
Dar Allee u duubtay
Dabadeed dadkiina
Dareeme dantoodoo
Darajadiisii Eebbeey
Dabbaaldeg ku daroo
Dawgii dalabkoodow
Isna ku dareershoo
Digrigiisoon doonaan
Dar Allee u duubtay
Dar Allee u duubtay

**BAABTIIS**

Cali Shariif Ibraahim

Walaalaha daacaddaahow
Baabtiiska noo daah qaadoo
Bayaansha dulucdiisa guud
Aan durba ku baraarugnee

Baabtiiska dulucdiisu waa
Hananay deeqdii Eebbee
Yaqiin aan ku durduurano
Yaqiin aan ku durduurano

Baabtiiska dulucdiisu waa
Dadwaynaha u oomanow
Masiixii oon ku dayanoon
Ku toosno dariiqa Eebbe

Baabtiiska dulucdiisu waa
Hananay deeqdii Eebbee
Yaqiin aan ku durduuranno

Yaqiin aan ku durduuranno

Baabtiiska dulucdiisu waa
dadka Ilaah oo loo jeedsho
Baybalkoo loogana digo
Cadaabta uunkeeda diiran

Baabtiiska dulucdiisu waa
Hananay deeqdii Eebee
Yaqiin aan ku durduuranno
Yaqiin aan ku durduuranno

Baabtiiska Dulucdiisu waa
Danbiyadoon ka fogaanoon
Dibnahaynana ka adkaanoon
Ka dheeraanno dulligoo dhan

Baabtiiska dulucdiisu waa
Hananay deeqdii Eebbee
Yaqiin aan ku durduurano
Yaqiin aan ku durduurano

Baabtiiska dulucdiisu waa
Darisyadoo la waaniyoo
Daacadnimo joogtaa iyo
Samaanta loogu dadaalo

Baabtiiska dulucdiisu waa
Hananay deeqdii Eebbee
Yaqiin aan ku durduurano
Yaqiin aan ku durduuranno

**DAA'IMOOW ILAAHOOW**
Y. B. Xirsi

Dagaaladaa sokeeyiyo
Dilka iyo colaadaha
Dagaalka inna daashaday
Dariiq weeye shaydaan

Soomaalaay bal daawada
Dabkan shidan dhexdiinii
Duudsi weeye soo jiray
Rabbigu aanu doonayn

Daa'imoow Ilaahoow
Deeqloow ku tuugnee
Dadkoo toobad keeniyo
Barakooyin soo dagaa
Dagdag noogu keenoo
Ruuxaagu soo dago

Ehelkiyo dadkaygoow
Farriin Daa'im soo diray
Lagu diirsadaa baan
Dagmadeenan kuu taal

Jano lagu dakeeyiyo
Boqortooyo daahira
Dariiqii ku gayn laa
Ciisaa daahir yeelee

Daa'imoow Ilaahoow
Deeqloow ku tuugnee
Dadkoo toobad keeniyo
Barakooyin soo dagaa
Dagdag noogu keenoo
Ruuxaagu soo dago

**DARIIQA AAKHIRO**
Cali Shariif Ibraahim

Waa naga dardaarane
Uunka dunida joogow
Ifka laysuma daayoo
Dariiq waaye aakhiroo
Laba dacal midkood buu

Dadku sahay u qaadane
Waana dardaarane ee
Uunka dunida joogow
Ifka laysuma daayoo
Dariiq waaye aakhiro
Laba dacal midkood buu
Dadku sahay u qaadane

Intaan laydin diidinoo
Dulqaadka Eebbe idlaanin
Daa'inkiina u soo noqda
Intaan laydin diidinoo
Dulqaadka Eebbe idlaanin
Daa'inkiina u soo noqda

Midkii doonistiisiyo
Raaca damaca beentaa
Duufiyaha Ibliis buu
Barri daris la noqonoo
Dab naar ah dhaxdiisa buu
Danbigiisu geeyaa
Midkii doonistiisiyo
Raaca damaca beentaa
Duufiyaha Ibliis buu
Barri daris la noqonoo
Dab naar ah dhaxdiisa buu
Danbigiisu geeyaa

Intaan laydin diidinoo
Dulqaadka Eebbe idlaanin
Daa'inkiina u soo noqda
Intaan laydin diidinoo
Dulqaadka Eebbe idlaanin
Daa'inkiina u soo noda

Daa'imow ku barinaye
Naga dhig dadka Masiixu
Qalbiyadooda daahiyo
Dulliga uu ka dhowroo
Dariiqiisa dhab taahe

Toosan uu ku dareeriyo

Daa'imow ku barinaye
Naga dhig dadka Masiixu
Qalbiyadooda daahiyo
Dulliga uu ka dhowroo
Dariiqiisa dhabtaa he
Toosan uu ku dareeriyo

**IFTIINKU DAARAY**
Y. B. Xirsi

Dikriga Eebbe
Dadkoow bilaaba
Xaqnimo doonoo
Shaydaanka diidaa

Daliilka Eebbe
Dawuu sidaaye
Daakhilka geeyoo
Injiilka doonta

Dariiqa toosan
Masiix diyaarshay
Durbaano qaatoo
Usoo dareera
Dadkoo hagaaga
Wada dawooba
Rabbiga doonoo
Dagdag u raaca

Dhiigiisi daataa
Dunuubta maydhay
Dunida oo dhan
Iftiin kudaaray

Jeeraa dambaysa
Dadkoo la duugo

Toobada doontoo
Daweeye raaca

Dariiqa toosan
Masiix diyaarshay
Durbaano qaatoo
Usoo dareera
Dadkoo hagaaga
Wada dawooba
Rabbiga doonoo
Dagdag u raaca

**SIDAY DOONISTAADU TAHAY**
Y. B. Xirsi

Dikriga Eebbaan hayaa
Xumaha waan diidayaa
Xaqnimadaan doonayaa

Dunuubtii aan gallaa
Rabbigu naga daahirshoo
Masiix baan dadkiisa nahay

Allow deeqlow Ilaah
Nimcada nagu doojiyoo
Siday doonistaadu tahay
Nolosha daa'im nooga yeel

Qalbigu daawuu heloo
Iftiinkaan daawannaa
Farxadda ku dabbaal dagnaa

Daruurihi baa da'oo
Intuu daadkii qulqulay
Caleen iyo doog la helay

Allow deeqloow Ilaah
Nimcada nagu doojiyoo
Siday doonistaadu tahay

Nolosha daa'im nooga yeel

**DAMBIDHAAFKA NOO FIDI**
Y. B. Xirsi

Dadkan dunida joogoow
Farriin Daa'im soo diray
Danteenii ku laran tahay

Xumaantoo la daayiyo
Xaqnimadoo la doortaa
Doonaa Ilaahay
Deeqloow Ilaahow
Annagoo dambaabnaan
Daa'imow ku tuugnee
Dulqaadkaaga sharafta leh
Nagu daadaheeyoo
Dambi dhaafka noofidi

Rabboow doonistaadii
Dariiqyada wanaagga leh
Dikrigaaga loo tumay

Farxad iyo damaashaad
Duhur iyo habeenkaba
Durbaanada lawada tumo

Deeqloow Ilaahow
Annagoo dambaabnaan
Daa'imow ku tuugnee
Dulqaadkaaga sharafta leh
Nagu daadaheeyoo
Dambi dhaafka noofidi

**QABIIL LA ISU DILA IYO**
Y. B. Xirsi

Qoomkii dambaabee

Dulmigiisu badan yahay
Cirku uma darooroo
Abaar buu dayoobaa

Soomaalaay bal daawada
Darxumadan haleeshee
Dagaalkaan na daashaday
Dambi weeye loo galay

Qabiil laysu dilo iyo
Dhiig la daadinaayaa
Dadka baday balaayada

Deeqloow Ilaahay
Dawuu kuu hayaa iyo
Barakooyin soo daga
Durduradan u kaalaya

Dadka wada jeclaadoo
Darajee walaalkaa
Dariiqyada wanaaga leh
Midnimada ku wada dega

Qabiil laysu dilo iyo
Dhiig la daadinaayaa
Dadka baday balaayada

**DARDAARAN**
Abwaan Qaamuus

Dadkaygoow wanaagsane
Waa iga dardaarane
Dabuubtayda maqaloo
Duufaanka shaydaan
Diidoo ha raacina

Dunidaynu ku noolnay
Daalimiinta ka buuxdaa

Dirir bay ka wadaanoo
Doonimaayaan wanaage
Danbigooda ka cayman

Diinteena wanaagsan
Dadka raaca Masiixa
Dembi dhaaf bay helaanoo
Ducadoodaa la arkaayoo
Digrigay badiyaan

Dadaal dheer aynu samayno
Dulqaad adag muujinoo
Da'yarta u sheegno ereygoo
Dumarka la wadaagno khayrkoo
Diyaar u ahaano waano

**DAWADAADI NOO KEEN**
Y. B. Xirsi

Daa'imow Ilaahow
Dacwadaydan qaadoo
Jawaab diirran noo keen
Durba Ruuxu soo dego

Dunidii xumaatoo
Dambi iyo wax yeeliyo
Dhiig la daadinaayaa
Bulshadeena daashaday

Rabbi darajo waynow
Dadkeenoo hagaagiyo
Barakooyin soo daga
Shaydaanka dumankaa
Dawadaadi noo keen

Darajaalihiiyoow

Dad intii kuraacdee
Ruuxu daadaheeyana
Way duudsiyaanoo

Anagoon dunuub galin
Duunyadooda aan dhicin
Dabin noo dhigaanoo
Dila dila naleeyiin

Rabbi darajo waynow
Dadkeenoo hagaagiyo
Barakooyin soo daga
Shaydaanka dumankaa
Dawadaadi noo keen

**DUCEEYOO SOO BAXAAY**
Y. B. Xirsi

Bulshadu way daalan tahay
Shaydaanku dabkuu shidiyo
Xumiyo dambigii la galay
Ayaa dalaw dheer ka riday

Colaad lagu dabar go'iyo
Dil iyo boobaa jiroo
Xinjirta dhiig daataybaa
Dalkii wada gaarayoo

Xumaha lama daawadee
Xertaay soo dareera oo
Duceeyoo soo baxoo
Baryada Daa'imkeen u dira

Dadkoo runta wada gartiyo
Dareenka xaqoo la helo
Dantiyo guusheenu tahay
Rabbigu uu doonayaa

Iblays dabinkuu xidhiyo

Dabkuu shiday diida oo
Dalbada Ruuxii Ilaah
Dawiyo deeq buu sidaa

Xumaha lama daawadee
Xertaay soo dareera oo
Duceeyoo soo baxoo
Baryada Daa'imkeen u dira

**DAWAALOO SAYID MASIIX**
Y. B. Xirsi

Dunida oo wada madaw
Dadkuna soo galay dunuub
Dulmigu wada daadsan yahay

Samada caad lagu dadoo
Daruuraha dhibic ka tagay
Abaaruhu daashadeen

Dawaaloow Sayid Masiix
Markuu dunideenan yimiid
Intuu dambidhaafay buu
Iftiin iyo duhur ka dhigay
Daliilka Injiilka iyo
Warkiisuu noo diroo
Dunida gaadhsiiya yidhi

Kuwii wada daalayee
Shaydaanadu ay dabreen
Ayuu cudurkii ka diray

Nimcada lagu doogsadiyo
Intuu dadka Ruux ku shubay
Dariiqii wada garteen

Dawaaloow Sayid Masiix
Markuu dunideenan yimiid
Intuu dambidhaafay buu

Iftiin iyo duhur ka dhigay
Daliilka Injiilka iyo
Warkiisuu noo diroo
Dunida gaadhsiiya yidhi

**WAAN DABBAAL DAGAYNAA**
Y. B. Xirsi

Daliilkii Ilaahay
Hadduu daakhil noo galay
Lama doorin karayoo
Deeq weeye noo timid

Nimcadiyo damaashaad
Durdurada xaqnimadaa
Rabbi noogu deeqoo
Waan dabbaal dagaynaa

Dadkan dunida joogaa
Hadii ayna dayrshaan
Dariiqiisa caashaqa
Dib u laaban maynoo
Darajooyin weeyaan

Kuwa dhagarta doonee
Dhiigga daadinaayee
Shaydaanku uu diray
Allow sii damiir wacan

Qalbigoo dawoobiyo
Ruuxoo ku soo daga
Daa'imoow ku tuugnee
Dawo caafimaad sii

Dadkan dunida joogaa
Hadii ayna dayrshaan
Dariiqiisa caashaqa
Dib u laaban maynoo
Darajooyin weeyaan

# R

**KUWA CIISE RAACOOW**

Y. B. Xirsi

Qalbigii rumayn hela
Raaxuu helaayoo
Rabbigiisa raacaa

Risiq iyo wanaag iyo
Nimco lagu riyaaqu
Reerkiisu yaalaa

Kuwa Ciise raacoow
Shaydaanka riixoo
U rakiba hubkiinii
Intaad Ruuxa raacdaan
Xaqnimada ku wada rida

Rabbiyow Masiixii
Naga rogay xumaantee
Ruuxiisa nagu shubay

Caruur uu rabeeyiyo
Reerkiisi baan nahay
Rugihiisa joognaa

Kuwa Ciise raacoow
Shaydaanka riixoo
U rakiba hubkiinii
Intaad Ruuxa raacdaan
Xaqnimada ku wada rida

**RUUXIISA NAGU SHUBAY**

Y. B. Xirsi

Dunidoo rafaaddoo
Shaydaan intuu raray

Runta aan la garanayn

Jinku degay rugtoodii
Ruugyada kawada xidhay
Xanuun daran kuwada riday

Wax la soo rafaadaba
Rabbiyow Masiix baa
Xumaantii ka rogayoo
Raaxooyin keenoo
Ruuxiisa nagu shubay

Xertan wada rumaysee
Ciise raacay baan nahay
Farxaddaan riyaaqnaa

Warwar nagu raraa iyo
Naga reeb walaacii
Raaxaanu joognaa

Wax la soo rafaadaba
Rabbiyow Masiix baa
Xumaantii ka rogayoo
Raaxooyin keenoo
Ruuxiisa nagu shubay

**REERAHA U YEEDHAAY**
Y. B. Xirsi

Xaqiiqdaan raacnayoo
Raaxaan ku gaadhnee
Dadkeena soo wada raroo
Reeraha u yeedhaay

Masiix baa loo riyaaqoo
Loo raxleeyee
Dadkeena soo wada raroo
Reeraha u yeedhaay

Runtii buu noogu yeedhoo
Waanu raacnee
Dadkeena soo wada raroo
Reeraha u yeedhaay

Raaxiyo rasamaalku waa
Ciisoo la raacee
Dadkeena soo wada raroo
Reeraha u yeedhaay

Rabbigu wuu noo dhintoo
Noo soo rafaadee
Dadkeena soo wada raroo
Reeraha u yeedhaay

Injiilkaa nagu dul raranoo
Rubadda yaalee
Dadkeena soo wada raroo
Reeraha u yeedhaay

Dadkiisoo wada rumeeyuu
Rabbigu doonee
Dadkeena soo wada raroo
Reeraha u yeedhaay

**RUUXIISA NAGU SHUBAY**
Y. B. Xirsi

Dunidoo rafaaddoo
Shaydaan intuu raray
Runta aan la garanayn

Jinku degay rugtoodii
Ruugyada kawada xidhay
Xanuun daran kuwada riday

Wax la soo rafaadaba
Rabbiyow Masiix baa

Xumaantii ka rogayoo
Raaxooyin keenoo
Ruuxiisa nagu shubay

Xertan wada rumaysee
Ciise raacay baan nahay
Farxaddaan riyaaqnaa

Warwar nagu rarraa iyo
Naga reeb walaacii
Raaxaanu joognaa

Wax la soo rafaadaba
Rabbiyow Masiix baa
Xumaantii ka rogayoo
Raaxooyin keenoo
Ruuxiisa nagu shubay

# S

## NAGA YEEL SAFKAAGII
Y. B. Xirsi

Rabbigaan sugaynoow
Samaantaada guusha leh
Sooryadaadi noo keen

Adigaa sarreeyoo
Sidaad doonta yeeloo
Mahad kuu sugnaataa

Sayidoow Ilaahoow
Xumaantaan samayniyo
Naga saamax eeddoo
Naga yeel safkaagii

Inaad soo degtaa baan
Saadaalinaynaa
Rabbiyow sugaynaa

Ubaxyaan sidnaayoo
Annagoo sufuufaan
Salaan kula sugaynaa

Sayidoow Ilaahoow
Xumaantaan samayniyo
Naga saamax eeddoo
Naga yeel safkaagii

## SAMAALOOW MASIIXII
Y. B. Xirsi

Suurtiyo qiyaamaha
Saacadoodi weeyee
Sayidkeena wada suga

Subaxdiyo habeenkii

Saqda dhexe markay tahay
Saacaddii ad joogtaan
Amaantiisa wada suga

Samaaloow Masiixii
Loo sudhay darteen geed
Wuuna saacidaayee
Xamdi siiya fara badan

Sarreeyahaa samada jira
Seef buu sitaayoo
Xukun aan saluug jirin
Lagu kala saxaayaa

Dadku laba saf weeyaan
Qaybo naartu solotiyo
Kuwa taajka loo sudhay
Safkii raacay weeyaan

Samaaloow Masiixii
Loo sudhay darteen geed
Wuuna saacidaayee
Xamdi siiya fara badan

**SARREEYIHII DUNIDEE**
Abwaan Shakiib

Sarreeyihii dunidee
Silcay aawadeenee
Dembigeeni qaadee
Sarakiciisi weeyee

Samadii ayuu tegay
Noo samee wanaagee
Safar buu ku maqan yahay
Suga wuuba soo noqon

Niyaddiina suubiya
Uurka saafi yeeloo

Sacabada u tuma oo
Sayidkaa amaana
Waa seeski noloshee

Gargaar yuuna siiyaa
Samaan yuu falaayoo
Sanku neefle oo idil
Sayidkoodi weeyaan

Salka nolosha weeyaan
Nabad suubban weeyaan
Farxad saaqday dunidiyo
Sayidka nolosha weeyaan

**SEYIDKU ISAGAA KU SIIN**
Abwaan Dictionary

Sifihii uu lahaa Masiixu
Samee adigoo rumeeyey
Sideeda u raac walaalo
Wixii sadrigaagu doono
Seyidku isagaa ku siine

Sirtaada adigoo adkaystay
Soonkiyo khayrkana yaqaana
Saaxiibka wanaagsan doono
Sidii u ducayso Ciise
Seyidku isagaa ku siine

Sumadda lagu yaqaano muumin
Su'aal adigoon qof weydiin
Samirku waa ka kow walaale
Si fiican u raac dariiqa
Seyidku isagaa ku siine

Sarbeebta hadalkaan wacnayn
Hadduu ruux kuu sar jaro
Suntiyo ha ku dhufan warmaha
Samirki Sayidka qaado

Seyidku isagaa ku siine

Suldaan jecel jiisaskiisa
Sariir ku xusoo amaanay
Sariyo hoos uu u heeso
Samada waa laga maqlaaye
Seyidku isagaa ku siin

**SARREEYIHII DUNIDEE**
Abwaan Shakiib

Sarreeyihii dunidee
Silcay aawadeenee
Dembigeeni qaadee
Sarakiciisi weeyee

Samadii ayuu tegay
Noo samee wanaagee
Safar buu ku maqan yahay
Suga wuuba soo noqon

Niyaddiina suubiya
Uurka saafi yeeloo
Sacabada u tuma oo
Sayidkaa amaana
Waa seeski noloshee

Gargaar yuuna siiyaa
Samaan yuu falaayoo
Sanku neefle oo idil
Sayidkoodi weeyaan

Salka nolosha weeyaan
Nabad suubban weeyaan
Farxad saaqday dunidiyo
Sayidka nolosha weeyaan

**NAGA YEEL SAFKAAGII**
Y. B. Xirsi

Rabbigaan sugaynoow
Samaantaada guusha leh
Sooryadaadi noo keen

Adigaa sarreeyoo
Sidaad doonta yeeloo
Mahad kuu sugnaataa

Sayidoow Ilaahoow
Xumaantaan samayniyo
Naga saamax eeddoo
Naga yeel safkaagii

Inaad soo degtaa baan
Saadaalinaynaa
Rabbiyow sugaynaa

Ubaxyaan sidnaayoo
Annagoo sufuufaan
Salaan kula sugaynaa

Sayidoow Ilaahoow
Xumaantaan samayniyo
Naga saamax eeddoo
Naga yeel safkaagii

**JANADA SAAMIGII LA DHIGAY**
Y. B. Xirsi

Injiilkoo lagu socdiyo
Xaqnimadaa seesku yahay
Samaantiyo guushu tahay

Dunida saxariirka jira
Waxaa lagu saari karo

Sayidka tiisoo la sugo

Nimciyo sooryooyinkii
Janada saamigii la dhigay
Xertiisuu siinayaa

Mulkiile na saacidoow
Adaa silic noo maroo
Dhiiggaad noo saydhisaa
Xumiyo dambigeeni saxay

Siduu doonaba karow
Adaa seeftaada wayn
Shaydaanka ku suulin kara

Ilaahaan wada sugnoow
Sarreeyuhu waa adiga
Rabbow saamaxaad nasii

Inaad noo soo dagtaan
Rabbow u sidnaa caleen
Dadkaagii kuu sugaan

Mulkiile na saacidoow
Adaa silic noo maroo
Dhiiggaad noo saydhisaa
Xumiyo dambigeeni saxay

# SH

**SOOMAALIDII SHANTA AHAYD**

Aweis A. Ali

Soomaalidii shanta ahayd
Loo sheekhya badiyoo
Shuhubooyin loo dhigay
Yay diin ku sheegaan
Waana sheeko xariiruu
Shaydaan usoo dhigay
Beenti lagu shuboo idil
Waa in laga shubaayoo
Loo sheegaa Injiilka
Isaa shaafinaayee

Waa sharaf Masiixuye
Noo shafeeca qaadoo
Shaki looga baxayee
Shacabkuba jaclaystee
Shirib ugu heesaan
Shallaytadu ma roonee
Waa nigaa sharraxaye
Sharrib oo mar soo arag
Shifo weeye kuu roon
Shiddo kaa fogaysee

Sokeeyiyo shisheeyaba
Shir intaad ku baaqdaan
Uga baxa shirqoolkoo
Shufto diimeed diidoo
Sharaflow Masiixa
Shugri intaad u celisaan
Shoob shooba idilkiin
Shucuurtiina muujiya
Idinkoo shirsanoo
Shaahid aad tihiinna

# DH

**AADAN IYO XAAWO**
Cali Shariif Ibraahim

Ilaahii dhulkiyo
Cirarkaba dhisee
Aadanna dharaar
Dhoobo ka unkoo
Misna dhankaa bidix
Xaawo ka dhuftow
Ilaahii dhukiyo
Cirarkaba dhisee
Aadanna dharaar
Dhoobo ka unkoo
Misna dhankaa bidix
Xaawo ka dhuftow

Dhab kuu barinaye
Eebbow ina dhowr
Dhab kuu baarinaye
Eebbow ina dhowr

Ilaahii dhib la'aan
Xaas uga dhigoo
Kuna yiri dhaafa
Geedkaa dhibka leh
Hana dhadhamina
Waydiin dhimashee
Ilaahii dhib la'aan
Xaas uga dhigee
Kuna yiri dhaafa
Geedkaa dhibka leh
Hana dhadhamina
Waydiin dhimashee

Dhab kuu barinaye
Eebbow ina dhowr
Dhab kuu barinaye
Eebbow ina dhowr

Dhaddig waa caruur

Aan doorin dhallaan
Dhawaqii Ibliiskey
Dhag u jeedisoo
Geedki ku dhagtoo
Mirey ka dhergeen
Dhaddig waa caruur
Aan doorin dhallaan
Dhawaqii Ibliiskey
Dhag u jeedisoo
Geedki ku dhagtoo
Mirey ka dhergeen

Dhab kuu barinaye
Eebbow ina dhowr
Dhab kuu barinaye
Eebbow ina dhowr

Allaa uga dhawaaqay
Beerta dhexdeedoo
Dhuumashey damceen
Dhakhsow u abbaaray
Kana soo dheereeyey
Dheeftii jannada
Allaa uga dhawaaqay
Beerta dhexdeedoo
Dhuumashey damceen
Dhakhsow u abbaaray
Kana soo dheereeyey
Dheeftii jannada

Dhab kuu barinaye
Eebbow ina dhowr
Dhab kuu barinaye
Eebbow ina dhowr

Durba dhadhamiyeen
Dhibkii dembigoo
Dhuuniga idilkii dhidid ku raadshoo
Dhashoodii gabalna
Dhagax bay isku dileen

**DHIDIB WEEYE ADAG**
Y. B. Xirsi

Jacayl Ciise dhigay
Ma dhaqaaqayoo
Dhisme weeye adag
Nimco lagu dhaqmiyo
Dheef buu sidaa

Kuwa dhoohanee
Dhab u garan xaqnimada
Shaydaanku dhibay
Aan ka dhicinee
Dhawaaqiina fura

Runta lagu dhargaa
Lagu dhiiradaa
Dhidib keeda wayn
Bulsho lagu dhaqaa
La dhaqaajin karin

Qoomaan dhaga lahayn
Indhahood dhaceen
Way dheeliyaan
Ma dhugtaan xaqnimo
Mana dhiiradaan

Seeskii la dhigo
Ee dhaawac qaba
Markii uu dhacaa
Waa lagu dhintaa
Caqli dheefsadaay

Runta lagu dhargaa
Lagu dhiiradaa
Dhidib keeda wayn
Bulsho lagu dhaqaa
La dhaqaajin karin

**XAQA LAMA DHAQAAJOO**
Y. B. Xirsi

Jacayl dhuuxa kaa galay
Lafta dhabarka taaliyo
Sanbabada dhaxdoodii
Dhiigiyo halbawlaha
Ku dhamaaday halisaha

Dhawaaqii samada iyo
Loo dhigay Injiilkii
Farxad lagu dhameeyoo
Guushiisu dhinac taal

Xaqa lama dhaqaajoo
Dhidib weeye adagoo
Haddii aad dhunkaal iyo
U walaaqdo dhimashada
Ciisaan ka dhalanoo
Buur weeye noo dhigan

Dadkan kala dhaqaaqee
Dhimashiyo xasuuq iyo
Dhiig daadinaayee
Dhagar mooday guulaha

Rabbiyoow dhibaatada
Adigaa dhamayn kara
Kuu dhawaaqnay adigee
Dhinac uun nagala qabo

Xaqa lama dhaqaajoo
Dhidib weeye adagoo
Haddii aad dhunkaal iyo
U walaaqdo dhimashada
Ciisaan ka dhalanoo
Buur weeye noo dhigan

**DHIB IYO GEERIDA U MARAY**

Y. B. Xirsi

Masiixa dhashiisiyeey
Dhawaaqan dhagaysta wayn
Xaqnimo waa loo dhintaa
Dhac iyo halis loo maraa

Xabsiga oo lagu dhigiyo
Dhirbaaxooyin kugu dhacaan
Dhibtuu soo maray Masiix
Maxaa loo dhigi karaa?

Dharaartii ay qodbeen
Warmaha lagu dhaawacee
Dharkiisii qaybsadeen
Dheecaan iyo dhiigga qubay
Dhintee dambigeena dhaqay
Dhibiyo geerida u maray

Aweiskii noo dhashee[2]
Xikmadda lagu dhaamiyoow
Warkiyo murtideenan dhigan
Dhammaan gaadhsii dunida

Masiix taladuu dhigaan
Xumaanta ku dhaafnayoo
Dhabtii janadaanu gali

Dharaartii ay qodbeen
Warmaha lagu dhaawacee
Dharkiisii qaybsadeen
Dheecaan iyo dhiigga qubay
Dhintee dambigeena dhaqay
Dhibiyo geerida u maray

[2] Aweis A. Ali waa tifaftiraha buuggan.

**DHALASHO YAAB LEH**
Abwaan Qaamuus

Kolkii aad dhalatay baa
Maryami ku dhunkatoo
Dhar bay kuu xidhay udgoon

Markii aad dhalatay baa
Dhawaaq samadaa ka yimi
Dhagihii maqlay uu cajabay

Kolkii aad dhalatay baa
Malaa'ig ku dhawrtayoo
Dhawaaq mushxaradi baxay

Markii aad dhalatay baa
Dharaartii nuurtayoo
Dhaayuhu ay wada farxeen

Kolkii aad dhalatay baa
Dadkoo dhami soo baxoo
Madaxdi ay dhaygageen

Markii aad dhalatay baa
Dhibaatadii laga baxoo
Dhalaankii kugu farxeeen

Kolkii aad dhalatay baa
Dhaqankii hagaagayoo
Dhalintii baratay diin

Markii aad dhalatay baa
Dhulkoo dhami magoolayoo
Roobkuna dhibicdii qulqulay

Kolkii aad dhalatay baa
Dhirtoo dhami wada baxdoo
Dhagaxu noqday dheeman sare

# C

**CIISOOW MASIIXOW**

Bashiir Muuse

Ciisoow Masiixow
Carshiga kii fadhiyayee
Cirka iyo dhulkaba
Inta ceegaagta oo idil
Loo caleema saarow
Ciil naga dul qaadow
Cafis inaad na siisaan
Codsi kuugu keennaa
Cimrigayo dhammaantii
Waan ku caabudaynaa
Ku caleema saarnaa
Adigaa na caynshoo
Cisi noogu deeqoo
Na calmaday dhammaanoo
Culaabteenna qaadoo
Caafimaad na siiyoo
Kugu caana maalnaa
Ciisoow Masiixow
Ciisoow Masiixow
Haddii aan cidlawno
Cabashadu badnaatoo
Cadaw nagu wareegoo
Cidda baahi qabatoo
Caafimaad la waayoo
Caradu ay cagaariyo
Cuudba bixini waydoo
Caanihii gobaadiyo
Cadba la heli waayoo
Ciirsi kale la waayoo
Cirku uu istaagoo
Cosobiyo ugbaadiyo
Cawsba la heli waayoo
Caawimaad xagaagiyo
Caraftii raxmaadkiyo

Cidhib baan sugaynaa
Ciisoow Masiixow
Ciisoow Masiixow
Marka aan catawnee
Cashiyo qureeciyo
Cuntadaba la waayee
Carruurta baahi qabatee
Ciil iyo rafaadiyo
Cadhada aan la jiifneen
Catawgu naga idlaadeen
Adigaan cawiyo cisho
Cirka oo mugdiyahoon
Cidna aan la garanayn
Kugu soo catawnaa
Innagoo cibaado leh
Culaabtiyo xanuunkiyo
Cidladiyo rafaadkaba
Naga caawinaayoo
Noo calool qabawshoo
Niyadda noo cusboonshoo
Carafiyo udgooniyo
Cidda oo barwaaqiyo
Cisi nagu mannaystoo
Aan ku caafimaadnaa
Ku cawaysimaynaa
Ammaan kugu cisaynaa
Cuudiyo xawaashiyo
Fooxa kugu casuunnaa
Ciisoow Masiixow
Ciisoow Masiixow

**CAD LAGU SIIYAY**
Cali Shariif Ibraahim

Ummad yahay cilmiyada Ilaah
Midiba waa cayne
Mar baa caalamkaan giddigiis

Catiri uunnayne
Mar baa carshiga wayne Rabbiga
Biyo celin hayeene
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiyee

Mar baa cirkaa bilicda san iyo
Camuudiba jirine
Mar baa cadceeddaa ilaystiyo
Cayn bili lahayne
Mar baa xiddigahaas cas cas iyo
Caadka sare socone
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiye

Mar buu Aadan ciid ku jiroon
Xaawo la cayimine
Mar baa mirihii Beer Ceedan
Cunna looga dhigaye
Marbaa la yiri Geedka Caqliga
Maaha calafkiine
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiye

Mar buu Eebbe u maan celshay
Waase caasiyeene
Mar baa la soo cayriyayoo
La keenay Carrade
Mar bay cudud iyo xoog gashay
Waxay cunayeene
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiye

Mar baa dadkii ciriyada dhulku
Alla cabsi diideene
Mar baa lagu ciqaabay roob
Cawiyo ah maaline
Mar baa intii lahayd camal san
Eebbe caymiyaye
Ummad yahay caqligaaga eeg

Waa cad lagu siiye

Mar baa codka Eebbe nabiyadu
U ciidmi jireene

Mar buu erayga Alle caddaan
Noogu yimiid ciidde
Marar buu sameeyay cajiib
Iyo calaamooyine
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiye
Waa Ciise Masiix bixiyaha
Caynka naga gooye
Waa kan ku baaqay cafis guud
Calaf waa halkiise
Waa kaan carruurtiisa nahoon
Caro uga badbaadne
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiye

Mar la caayoo la qadfay
Ceeb laawahaase
Mar baa ciidan loo dalbaday
Ceeb laawahaase
Mar baa rag geed lagula calaqay
Ceeb laawahaase
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiye

Waa kan curiyay Injiilkaan
Ceeb laawahaahe
Waa kay curyaAminta iyo
Camoolku ku farxeene
Waa kii maydad soo celiyo
Caysh hor leh siiyaye
Ummad yahay caqligaaga eeg
Waa cad lagu siiye

Ilaahow adaa Caadil ah
Oon ceeb lahayne

Adaa siiya ciddaa doontid
Caqiida suubane
Adaa cudud iyo xoog lahoon
Kuu cabanayaaye
Fayd caqliga dadkayga
Waa sida ciyaale
Fayd caqliga dadkayga
Waa sida ciyaale

**XAQII BAA NOO CADAADOO**

Y. B. Xirsi

Mar kuu Curadkii dhashay
Baan wada ciyaarroo
Xaqii baa noo cadaadoo
Waanu ciidnee

Cirkii baa noo darooroo
Cagaarkii baa is gaadhee
Xaqii baa noo caddaadoo
Waanu ciidnee

Colaaddii baa dhamaatoo
Cafis la gaadhee
Xaqii baa noo caddaadoo
Waanu ciidnee

Qalbiga Ruuxaa na cugayoo
Calaf na siiyee
Xaqii baa noo caddaadoo
Waanu ciidnee

Caruur tiisaan ahaanoo
Cudud na siiyee
Xaqii baa noo caddaadoo
Waanu ciidnee

Culayskii naga dhamaayoo

Farxad cawaynee
Xaqii baa noo caddaadoo
Waanu ciidnee

Wanaag baa naloo camirayoo
Ciise raacnee
Xaqii baa noo caddaadoo
Waanu ciidnee

**CISEEYA**
Abwaan Shakiib

Ma cidloodo oo
Ma ciishoodo oo
Ma cabsoodo oo
Ruuxii cuskada
Ciisihii Masiix

Ciseeya, Ciseeya
Rabbiga caabudoo ciseeya
Cod dheer ugu heesa

Cayn kastaba adduunyada
Inta ummad calan leh
Kala caynba cayn ah
Cirooliyo caruurba leh
Caaddil weeye arsaaqee

Ciseeya, Ciseeya
Rabbiga caabudoo ciseeya
Cod dheer ugu heesa

Caqligiina kaashadoo
In uu Ciise yahay Sayid
Caad innagama saarnee
Dad badan baa caabudaayee

Ciseeya, Ciseeya
Rabbiga caabudoo ciseeya
Cod dheer ugu heesa

Ciise Masiixna wuxuu yahay
Caawiyaha cidkastoo
Boqorka caalamkoo dhane
Cawo iyo maalin weheshada

Ciseeya, Ciseeya
Rabbiga caabudoo ciseeya
Cod dheer ugu heesa

**CALOOL SAMAAN**

Cali Shariif Ibraahim

Cilmiga Ilaahey idil waa kala ceyn
(Idil waa kala ceyn)
Cuduriyo fiyoobi ninba calafkiise
(Ninba calafkiise)
Cadaabyo jannana kala cirib roone
(Kala cirib roone)

Cilmiga Ilaahey idil waa kala ceyn
(Idil waa kala ceyn)
Cuduriyo fayoobi ninba calafkiise
(Ninba calafkiise)
Cadaabyo jannana kala cirib roone
(Kala cirib roone)

Masiixaa na culay cidna lama sinnee
Masiixaa na culay cidna lama sinnee
Aan ugu caweyno idil calool sami
Aan ugu caweyno idil calool sami

Ciqaabta Ilaah oon cidina ka ceyman
(Cidina ka ceyman)
Inanka Cadraddaa inaga celiyoon
(Inaga celiyoon)
Cadkiisa nahayoon ku caana maallay
(Ku caana maalay)

Ciqaabta Ilaah oon cidina ka ceyman
(Cidina ka ceyman)
Inanka Cadraddaa inaga celiyoon
(Inaga celiyoon)
Cadkiisa nahayoon ku caana maallay
(Ku caana maalay)

Masiixaa na culay cidna lama sinnee
Masiixaa na culay cidna lama sinnee
Aan ugu caweyno idil calool sami
Aan ugu caweyno idil calool sami

Waa cawooyinkey mooradii lo'aad
(Mooradii lo'aad)
Nal ka caddaatee dadku cajiboo
(Dadku cajiboo)
Durba cibaado ey ku camireen
(Ey ku camireen)

Waa cawooyinkey mooradii lo'aad
(Mooradii lo'aad)
Nal ka caddaatee dadku cajiboo
(Dadku cajiboo)
Durba cibaado ey ku camireen
(Ey ku camireen)

Masiixaa na culay cidna lama sinnee
Masiixaa na culay cidna lama sinnee
Aan ugu caweyno idil calool sami
Aan ugu caweyno idil calool sami

# G

**UBAXYADAN UGURA**
Y. B. Xirsi

Dunidan Guulihii dhigee
Cirkan sare gingimay
Dhulka gogol ka dhigay

Guud ahaan baldaya
Xisaab gaara iyo
Qorshihiisan go'an
Inba gaar ka dhigay

Mahad gaara iyo
Amaantiisa guud
Gaadhsiiya oo
Guud ahaan bulshooy
Kaalay gaardiyoo
Ubaxyadan u gura

Nabad lagu gam iyo
Risqigeenan go'an
Goor iyo ayaan
Guullaheen ka yimiid

Gafafkii xumaa
Dunuubtii la galay
Yuu ka gooyayoo
Gaadhsii xornimo

Mahad gaara iyo
Amaantiisa guud
Gaadhsiiya oo
Guud ahaan bulshooy
Kaalay gaardiyoo
Ubaxyadan u gura

**MASIIXAY GAAR U TAHAY**
Y. B. Xirsi

Wakhtigu wuu gaaban yahay
Waliba geeribaa jirtee
Caqliga gaadhsiiya taloo

Gu' yaal cimri dheer nin helay
Wuxuu gaban gaabsadaba
God iyo iil baa lagalin

Badbaadiye guusha sida
Masiixay gaar u tahay
Midhaha ruux lagoosta iyo
Milguhu gurigiisa yaal

Dunidu gabal gaabtay iyoo

Hadh weeyaan labaada galiin
Wakhtiga midba gees jiraa

Rumee guulloow Masiix
Galoo gurigiisa taga
Nolosha gaaree la helay

Badbaadiye guusha sida
Masiixay gaar u tahay
Midhaha Ruux la goostay iyoo
Nimcadu gurigiisa taal

**CIISE NAGAMA GO'I KARO**
Y. B. Xirsi

Takoor gaar naloo xidho
Hadday talo ku gooyaan
Gumac iyo rasaas kulul
Ay nagu garaacaan

Sunta lagu go'aa iyo

Gudin iyo masaar daran
Qoorta nagaga gooyaan
Ciise nagama go'i karo

Jacayl galay quluubtiyo
Wadnaheenan gaarka ah
Ninka gooya yidhiyoow
Go'aankaagu waa been

Xaqa lagama guuroo
Lama goyn karaayee
Gu' barwaaqo oo da'ay
Geeddiga u soo rara

Cadaw gaara baa jira
Gees xun kuu kaxeeyee
Guulside Masiixii
Gurigiisan kaalaya

Jacayl galay quluubtiyo
Wadnaheenan gaarka ah
Ninka gooya yidhiyoow
Go'aankaagu waa been

**GARGAARKAAGA NOO FIDI**
Y. B. Xirsi

Gabogabo colaadeed
Galawgaa dhawaaqoo
Galayuuska taahiyo
Goohiisa aan dayn

Gayigeena oo idil
Godob la isu laayiyo
Gaadaaga aanada
Godka iilka loo galay

Guuloow Ilaahoow
Gacmaan hoorsanaayaa

Gulufkiyo dagaalada
Adaa goyn karaayee
Gargaarkaaga noo fadi

Gafuur duubtayaashii
Gees maray wanaaggee
Xaqnimada ka guuree
Go'aankoodu dila yahay

Gumaysiga ibliiskee
Dadka kala guraayee
Gumac iyo gantaalaha
Ku gubaaya maatida

Guuloow Ilaahoow
Gacmaan hoorsanaayaa
Gulufkiyo dagaalada
Adaa goyn karaayee
Gargaarkaaga noo fidi

# F

**FAAFIYA WANAAGGA**

Y. B. Xirsi

Dambi kaba fogaadoo
Runta fala wanaaga leh
Fiirsadaa xaqnimadoo
Wada foojignadaay

Fasahaadka dunidiyo
Shaydaan wuxuu falo
Intaad wada figaysaan
Farxad siiya Eebbaha

Ficiladii xumaa iyo
Fogaantii dunuubtii
Kii naga furfurayoow
Qalbigaad fadhiidaa

Fiidkii markay tahay
Faa'iidooyin raadshoo
La faqoo Ilaahay
Qalbigiina wada fura

Iimaan fayaw baa
Ka fakada xumaantee
Faraskiina fuuloo
Faafiya Wanaagga

Ficiladii xumaa iyo
Fogaantii dunuubtii
Kii naga furfurayoow
Qalbigaad fadhidaa

# Q

**MASIIX BAAN QAABILAA**
Y. B. Xirsi

Dunida qalalaasa iyo
Dagaal iyo qaxbaa ka jira

Bal daya dhulkan qarada wayn
Gariiree quruuma rogay
Qiyaastiisa aan la garan

Qarniyo kahor xaajadii
Qoraaladu ay.dhigeen
Ayaa qorshahoodi yimid

Qudduus baan haatan nahay
Masiix baan qaabilnaa
Rumaynoo wada qirnaa
Qalbiga Ruuxa noogu shubay
Waliba qoys baan la nahay

Qiyaamihi baa dhawoo
Dunidu way qiiqaysaa
Qarkay rogmadkii u taal

Qaadirka inna uumay iyo
Xaqnimadoo loo qasdiyo
Ayuu qorshaheenu yahay

Bulshooy isa soo qabtoo
Qabsada xadhigiisan wacan
Rumeeyoo quluubta gali

Qudduus baan haatan nahay
Masiix baan qaabilnaa
Rumaynoo wada qirnaa
Qalbiga Ruuxa noogu shubay
Waliba qoys baan la nahay

**BADBAADADU QAALI WEEYAAN**
Amin A. Axmed

Dharaartuu jidkii qalloocnaa
Qaaddirku iga soo kaxeeyay
Kolkuu qalbigaygii taabtay
Nimcadii shalay iga qarsoonayd
Sow maan arag qiimaheedii

Badbaadadu qaali weeyaan
Qasdiga Eebbe ayay ku timid
Qofna kuma furan heddiisii
Shuqullo qumman uu sameeyay

Qaraar anigoo lay cabsiiyay
Sharwade wax la qaybsanaayo
Kolkaan maqlay qawlkii Eebbe
Intay naftu khushuuc la oyday
Sow may qaadin dariiqii toosnaa

Eebbena qorshihiisa maaha
Qof lnuu aadmiga ka lumo ee
Hanuunka waa lagu qaboobaa
Qaayehiisa haddaan la dilin

**RABBI NAGA KOR QAAD**
Y. B. Xirsi

Qaadirow Allow
Waad na qaabishoo
Na qaboojisee
Mahaddeena qabo

Qawlkii xaqnimo
Qalbigii helaa
Ma qabsado walaac
Farxad buu qoslaa

Rabbiyow qorshaha

Aad noo qortee
Qalin noogu dhacay
Yaanu qaadanaa

Qalalaasa iyo
Qoonsimaadki hore
Rabbi naga kor qaad

Qiimo waannu bixin
Qaadir Eraygiisa
Qorshaheenu waa
Dariiqiisa quman

Naxariis qabaw
Barako qaali ah
Qaadir siduu rabo
Yaan quluubta gelin

Rabbiyow qorshaha
Aad noo qortee
Qalin noogu dhacay
Yaanu qaadanaa

Qalalaasa iyo
Qoonsimaadki hore
Rabbi naga kor qaad

**AMAANTIISAN QAADNAA**
Y. B. Xirsi

Dhulkan qarada waynliyo
Qaabkan samada loo dhigay
Qaydkan badaha lagu xidhay
Wax qiyaasayaan jirin

Qorshe weeye Eebboo
Qalin iyo xisaabaad
Qalad aan lahaynbuu
Waynuhu ku wada qoray

Waanu wada qabawnoo
Qudduusoow Ilaah baa
Hadyad qiimo waawayn
Qalbigeena galiyoo
Intaan wada qushuucnaan
Ammaantiisa qaadnaa

Quruumaha bal daawada
Wabiyada qulqula iyo
Badahaa qashaadh kale
Noolaha ku kala quban

Qiyaas li'ida loo dhigay
Qorshahooda noloshiyo
Loo qorayna quudkee
Qadoodiga ka nabadgalay

Waanu wada qabawnoo
Qudduusoow Ilaah baa
Hadyad qiimo waawayn
Qalbigeena galiyoo
Intaan wada qushuucnaan
Ammaantiisa qaadnaa

# K

**KADEEDKII NAGA DHAMAA**

Y. B. Xirsi

Korreeyaa keenayoo
Waan keefaynaayee
Kadeedkii naga dhamaayoo
Waa kalkeenii

Nimciyo kaydkii Ilaah baa
Kadinka yaaloo
Kadeedkii naga dhamaayoo
Waa kalkeenii

Xertii baa kaalin qaaddoo
Wada koraysoo
Kadeedkii naga dhamaayoo
Waa kalkeenii

Kurbiyo warkii dhamaayoo
Masiixii yaan kulanoo
Kadeedkii naga dhamaayoo
Waa kalkeenii

Ka gal kadinkiisu
Waa kaa naloo banneeyee
Kadeedkii naga dhamaayoo
Waa kalkeenii

Karaamadu tii Masiixu
Keenay weeyee
Kadeedkii naga dhamaayoo
Waa kalkeenii

# L

**SOOMAALIDAN LA WAALEE**
Aweis A. Ali

Soomaalidan la waalee
Laayaca jeclaystee
Lab iyo dheddigba
Loo qooshay lalabkiyo
Diin looga soo dhigay
Wixii laabtu diiddaba
Xal la soo asteeyoon
Laab laab lahayn baan
Idiin laba shubaayaa
Labanay intay noqon

Waa liibaan Masiixuye
Deeqduu la yimid
Lacag laguma iibsado
In la raaco Ciise
Yaa lagu badbaadaa
Dadku waa laciifoo
Waxay kuba ladnaadaan
Waa Kitaabka Luukoos
Laxni aan lahayne
Looga baxo lunsanaan

Masiixoo la raacoo
Laga laba labayn baa
Daacad loogu toosaa
Lurka looga baxayaa
Injiilkoo la qaatoo
Dadka lala wadaagoo
Loo dhigo adduunkaa
Lagu wada negaadaa
Nafta lagu dejaa oo
Nabad lagu helaayaa

# M

## LOO YAHAY MARKHAATIGA

Y. B. Xirsi

Ciisoow Masiixoow
Kaama maarmi karaynoo
Maalintiyo habeenkaba
Miciinkeenu waa adi

Muxubada kalgacal kee
Na muquurshay Ruuxaan
Muuqaaga sharafta leh
Yaan maanta sugaynaa

Rabbiyoow Masiixoow
Mucjisooyinkaagii
Loo yahay markhaatiga
Mahadoodi naga hoo

Maalintay xisaabtiyo
Kala miidhistaadii
Mulkiiloow timaado
Miciinkaaga noo fidi

Kuwa midigta joogee
Maqaamkii janada iyo
Muuqaaga daawada
Naga yeel Masiixoow

Rabbiyoow Masiixoow
Mucjisooyinkaagii
Loo yahay markhaatiga
Mahadoodi naga hoo

## MASIIXU MA QAYBSAMEE

Y. B. Xirsi

Masiixu war buu sidaa
Mugdiga kaa reebaya
Iftiin kuu muujiyaa

Dunuubtuu maydhayoo
Xaqnimo noo muujiyoo
Xumaha naga maanacaa

Curyaankii meel fadhiyay
Intuu muruqyada rakibay
Mushaaxoo orod ku yidhi

Masiixu ma qaybsamee
Midnimaday guushu tahay
Midhaha lagu gaadhayaa
Mucjiso Ruuxaa baxshee

Muraadkeenu waa Injiil
Dunida maqashiiya oo
Mugdiga laambado ku shida

Xertaay meeshaad martaba
Miciinkeenu waa isaga
Masiix baa xooggu yahay

Masiixu ma qaybsamee
Midnimaday guushu tahay
Midhaha lagu gaadhayaa
Mucjiso Ruuxaa baxshee

**LOO MARKHAATI YAHAY**
Y. B. Xirsi

Mucjisooyinkii
Masiix uu qabtee
Meel kastaba dunida
Loo markhaati yahay

Dambi maydhihii
La musbaarayee
Darteen loo mudmuday

Maalmo galay xabaal

Ciisoow Masiix
Mahad loo ceshiyo
Amaan buu mutee
Mulkiilow Ilaah
Mahaddeena hoo

Mugdigii dunida
Meel kastaba kajiray
Masiixii ka rogay
Wuu mahadsan yahay

Muxubiyo jacayl
Nagu maamulyoo
Naga moos xumaan
Waan midaysannahy

Ciisoow Masiix
Mahad loo ceshiyo
Amaan buu mutee
Mulkiilow Ilaah
Mahaddeena hoo

**AYAAN MAANTA QIRAYAA**
Amin A. Axmed

Kii maanka iga xaday
Ee i marin habawshee
Mugdigana i geliyay

Haddaan mooradiisiyo
Minankuu lahaa iyo
Meeshii baas ka soo tegay
Rabbi mahaddii weeyaan

Kol haddaan Masiixaba
Magantiisii soo galay
Inay i daysay murugadi

Ka adkaaday mawdkii
Ayaan maanta qirayaa

Kii moolka igu riday
I baal mariyay nuurkoo
Mabda been ah iga gaday

Haddii aanu maalmahan
Maamulayn naftaydoo
Aan ka madax banaanahay
Mawle galladdii weeyaan

Kol haddaan Masiixaba
Magantiisii soo galay
Inay i daysay murugadii
Ka adkaaday mawdkii
Ayaan maanta qirayaa

**MAHAD AY U CELIYEEN**
Y. B. Xirsi

Masiix dhalashadiisii
Iftiin meel ka muuqdaa
Maqaawiirti aragtoo
Raadiyeen Masiixii

Maqsin meel la seexdiyo
Markay hoy ka waayeen
Mooradii lo'aad buu
Masiixii habeen dhalay

Malagyadii Ilaahay
Ammaantii Masiixay
Adhi mayrac yaashii
Markii ay u muujeen
Mahad ay u celiyeen

Maalintuu Masiix yimid
Mugdigii dhamaadoo
Murugooday shaydaan
Waana mahad Ilaahay

Boqorkii masayree
Midiyaha afaystee
Meel kastaba ka waayee
Malagiisi uu galay

Malagyadii Ilaahay
Ammaantii Masiixay
Adhi mayrac yaashii
Markii ay u muujeen
Mahad ay u celiyeen

# N

**NABAD SIIYE WAA ADI**

Y. B. Xirsi

Eraygiisa noolee
Qalbiyada nuglaadiyo
Niyadaha dawayn kara
Nuurkiisan daawada

Nimco guusha lagu helo
Rabbi nagu manaystoo
Nacaybkii bulshada iyo
Nuxuustuu kasaaraa

Nimcaaloow Ilaahoow
Nuur iyo wanaagoow
Noloshayda aayaha
Nabad siiye waa adi

Ruuxaaga noloshiyo
Dadka siiya nagidaa
Noogu deeq Ilaahoow
Nugaylada an gaadhnee

Qoomkii nacaybkiyo
Naxliyadu ka buuxaan
Mana gaadho waligii
Noloshana ma haystaan

Nimcaaloow ilaahoow
Nuur iyo wanaagoow
Noloshayda aayahaa
Nabad siiye waa adii.

# W

**WANAAJIYE WAA ILAAH**
Y. B. Xirsi

Walaalaha midoobayoow
Warkii Eebbaha ka yimiid
Wanaagiisaad hesheen
Ammaantiisaad waddaan

Dunida warwarkii ka jiray
Awood lagu waabiyiyo
Intaad xaqa waabataan
Masiixaad weheshataan

Wanaajiye waa Ilaah
Xumaha kaa weeciyoo
Nolosha lagu waaro iyo
Jannuu kuu soo wadaa

Nimcada wabiyada burqada
Rabbigu weel noogu shubay
Qalbiga noo waraabiyoo
Walaal Ruuxaa na wada

Walaacii naga baxyoo
Rajadu waa guul Ilaah
Farxadaan wada heesaynaa
Xaggiisuu noo wadaa

Wanaajiye waa Ilaah
Xumaha kaa weeciyoo
Nolosha lagu waaro iyo
Jannuu kuu soo wadaa

# H

**HOOY YIMAADAAY**

Y. B. Xirsi

Adduunyadu waa hayaanoo
Hoyaatin weeyee
Bulshooy soo wada hanuunoo
Hooy imaadaay

Dambiga waa lagu halaagmaa
Lagu hungoobaa
Bulshooy soo wada hanuunoo
Hooy imaadaay

Nimciyo hoosiis qabaw
baan kuu hayaayee
Bulshooy soo wada hanuunoo
Hooy yimaadaay

Jidkiisaa lagu hayaamoo
Lagu hagaagee
Bulshooy soo wada hanuunoo
Hooy yimaadaay

Masiix baa noo hagaajoo
Noo hog galayee
Bulshooy soo wada hanuunoo
Hooy yimaadaay

Hadyada ruuxuu nasiiyoo
Nagu hagoogee
Bulshooy soo wada hanuunoo
Hooy yimaadaay

Curyaanaduu u hiishoo
Wada habeeyee
Bulshooy soo wada hanuunoo
Hooy yimaadaay

**NOO HIBEEYAY TIISII**
Y. B. Xirsi

Bulshadoo halawdoo
Shaydaanka halistaa
Hantidiisa loo yahay

Geeddiga hayaankana
Meel lagu hagaagiyo
Hoyga aan la garanayn

Wax la soo harraadaba
Halyaygii Masiix baa
Guusha noo horseedoo
Noo hibeeyay tiisii

Hadyad Ruux Qudduusuu
Rabbi nagu hagoogoo
Nabad baanu haynaa

Hilinkiisi toosnaa
Yuu nagu hagaajoo
Farxadaan la hoyanaa

Wax la soo harraadaba
Halyaygii Masiixbaa
Guusha noo horseedoo
Noo hibeeyay tiisii

Rabbigeena hodan kaa
Harqoodkiisa qaadoo
Hoygiisa kaalayaa

Hubaal weeye tiisuye
Jannuu noo hayaa iyo
Geedka nolosha laga heloo

Wax la soo harraadaba
Halyaygii Masiix baa

Guusha noo horseedoo
Noo hibeeyay tiisii

**WAAN ISKU HALLEEYAA**
Amin A. Axmed

Kansar igu habsadayoo
Ka hadleen dadkoo idil
Inuu yahay mid halis badan
Heddaydii ma goynine

Weliba hawlahaan waday
Hal abuurkii maansada
Igama uu horjoogsanin

Caafimaadkii aan helay
Oo aan maanta haystana
Hibo Eebbe weeyaan

Ruux Masiixa hoos galay
Ma hungoobo weligii
Anna hadiyo jeerba
Waan isku halleeyaa
Hiilna ka waayi maayo

Hantida la sheegoo
Qofku hodan ku yahay waa
Iimaan hanashadiisiyo
Isu hibaynta Eebbe

Hayntaydi jeebkoo
Wax ku haray lahayn buu
Ii buuxshay haamaha

Hamuuntii aan qabay iyo
Xanuunkii i hayay buu
Haddana iga dulqaaday

Ruux Masiixa hoos galay

Ma hungoobo weligii
Anna hadiyo jeerba
Waan isku halleeyaa
Hiilna ka waayi mayo

**ERAYGAAGA HODANKA AH**
Y. B. Xirsi

Habeeyoy Ilaahow
Hilinkaagi toosnaa
Kaalay nagu habeeyoo
Xaqa noo horseedoo

Hadimada iblayskiyo
Shaydaan hogguu qodo
Nagahay Ilaahow
Guusha noo horseedoo

Eraygaaga hodankaa
Nolol laga helaayoo
Hiil weeye noo yimiid
Mahad baan u haynaa

Dadkoo wada heshiiyaa
Barakada la helayaa
Cirka hogol da'aysiyo
Nimco badan la wada heli

Hiiliyow Ilaahay
Hadalkiisa yeeloo
Ka hadhoo xumaantii
Xaqnimada ku soo hiro

Eraygaaga hodankaa
Nolol laga helaayoo
Hiil weeye noo yimiid
Mahad baan u haynaa

# Y

**WAXA AAN LA YAABAA**
Aweis A. Ali

Waxa aan la yaabaa
Soomaalidan yaacdee
Yool beena loo dhigay
Lagu yiri Injiilkii
La yimid Masiixii
Yaa lumay waa hore!
Aan yaqiinna loo hayn
Yaahuu ma oranine
Yaabka loola yimide
Mana ay yaboohin

Yac bal may yiraahdaan
Oy iska yureeyaan
Yaxyax laawa yaashaas
Aan wanaagga yeelin
Injiilkay yiraahdeen
Lumis yuu ku sugan yahay
Is yeel yeeli maayee
Meel kastuuba yaalaa
Marag yaan u haystaa
Oon u yeeri karayaa

Soomaalida yiciisnimo
Yaabsanaanta lagu helay
Rabbigaa u yeeraye
May warkiisa yeelaan?
Yaxaas aan u turahayn
Maxay ugu yagleelaan
Mid yedaaya oo dili?
Yibal miyay ka doorteen
Masiixay ka yaaceen
Yabaqoodu waa kaa

## GUNAANAD

Waxaannu halkan ku soo gabagabaynay suugaantii ay soo gudbiyeen Maisixiyiin Soomalaiyeed oo Eebbe hibo u siiyay alifka qasiiddooyinka. Waannu uga mahadnaqaynaa deeqsinimaddan. Waxaan akhristow kaa codsanaynaa in aad buuggan la wadaagto cid walba oo aad garanayso oo ka faa'iidaysan karta.

Sugaantu waa qayb wayn ka mid ah Kitaabka Qudduuska Ah. Waxaa lagu qiyaasaa 33% Kitaabka in uu u qoran yahay nidaam tixeed. Kutubta kala ah Ayuub, Sabuuradda, Maahmaahyadii, Wacdiyaha, iyo Gabaygii Sulaymaan ayaa dhammaan u qoran hab tixeed aad u macaan.

Waxan halkan si qoto dheer uga mahadnaqaynaa dhammaan walaalaha alifay soona gudbiyay qasiidoyinkan. Waxaa kale oo aan mahad badan u haynaa dadka dib u akhriyay suugaanta si ay u hubiyaan tayadooda. Waxaa kale oo xusid mudan dhiirigelinta aan ka helnay Ururka Soomaliyeed ee Kitaabka Qudduuska Ah (Somali Bible Society) oo xil wayn iska saara sidii dhaxal qoraal ah looga tegi lahaa ummadda Soomaaliyeed ee jecel Rabbiga.

Shardi ma ahan in qofka ka faa'iidaysanayaa buuggan uu ahaadaa Masiixi. Somaali badan oo Muslimiin ah ayaa xigamadaha iyo macaanka suugaantan ku raaxaysan karaya. Waxaan Eebbe ka baryaynaa in Rabbigu furo indhaha dhammaan dadka akhriya buuggan qiimaha leh oo soo saaritaankiisa laga maray howl aad u badan.

Walaalaha Soomaliyeed ee akhrista buuggan waxaan ka codsanaynaa in ay u duceeyaan Kiniisadda Soomaaliyeed oo aan wada ognahay in lagu hayo silic iyo takoor uga yimaada Soomaalida Muslimiinta ah oo dal iyo dadba uu ka dhaxeeyo. Waa hubaal in Kiniisaddu ku korto kuna barakowda silica sida uu sheegay Tertullian oo wax u qori jiray Kiniisadda markii ay cusbayn. Tertullian (155 – c. 220) wuxuu yiri, "Dhiigga shahiidka ayay ku kortaa kiniisaddu (the blood of the martyr is the seed of the church)."


Wixii talo iyo tusaale ah inoogu soo gudbiya: amazingwisdom@gmail.com


Dr. Aweis A. Ali
Twitter: @DrAweisAli
https://aliaweis.academia.edu/


## ABOUT THE AUTHOR


Rev. Aweis A. Ali, PhD, is a missiologist and an authority on the persecuted church in the Muslim world with special expertise on the Somali church. He became a disciple of Christ in Mogadishu, Somalia, in 1986 through the ministry of SIM. Aweis was a co-pastor of a house church in Mogadishu, Somalia, in the mid 1990s when 12 of its 14 members were martyred for their faith. Aweis has been ministering in the Muslim world since 1993; he has lived and served in world areas that include the Horn of Africa, East Africa, West Africa and the United States. Aweis earned a BTh degree from the Evangelical Theological College in Addis Ababa; an MDiv degree from Nazarene Theological Seminary in Kansas City, Missouri; and a PhD from Africa Nazarene University in Nairobi. Aweis' PhD thesis is titled "Persecution of Christians and its Effect on Church Growth in Somalia." Aweis is the author, editor or translator of 14 books and more than a dozen articles. He is the founder and the Series Editor of the *Maansada Masiixa* (Anthology of Somali Christian Poetry) as well as the *Somali Bible Society Journal*, the official journal of the Somali Bible Society. The author's research interests include the persecution of Christians, church history and church growth in the Muslim world; Waaqism, Judaism, Christianity and Islam in the Somali Peninsula; global paremiology and Somali poetry. Dr. Aweis can be reached at: amazingwisdom@gmail.com, Twitter: @DrAweisAli, Website: https://aliaweis.academia.edu/


## OTHER BOOKS BY DR. AWEIS A. ALI

































WALKING WITH HIM
A CATECHISM FOR GROWING CHRISTIANS
AND SERIOUS SEEKERS
Aweis A. Ali



SOMALI
Bible Society

Maandeeq Publishing

ISBN 978-99990-996-6-0